



FEDERAL GOVERNMENT
OF SOMALIA

Warbixinta Maamulka Maaliyadda

Maajo 2022



WORLD BANK GROUP



FEDERAL GOVERNMENT
OF SOMALIA

Warbixinta Maamulka Maaliyadda

Maajo 2022



WORLD BANK GROUP

TUSMO

Arar	i
Ereyo la soo gaabiyay	iii
Dulmar kooban	iv
I. Hordhac.....	1
Kaalinta Guddiga Maamulka Maaliyadda (GMM).....	1
Ujeedada Warbixinta Maamulka Maaliyadda	2
2. Khataraha maamulka maaliyadeed inta lagu jiro xiliga kala guurka siyaa-sadeed, Luulyo 2021 ilaa May 2022.....	3
Dib u dhaca doorashada.....	3
Cadaadis miisaaniyadeed oo daran	5
Dib-u-Dhaca Dib u Habeynta.....	10
Hababka liita ee qandaraas bixinta	12
3. Hortabinada Maamulka Cusub.....	16
Sii wadida dib-u-habaynta dhaqaalaha iyo maaliyadda	16
Ballanqaadka Nidaam Cadaaladeed ee libka iyo Qandaraasyada.....	17

TUSEYAAL

Tusaha 1: Taageerada miisaaniyadeed ee la siiyay DFS 2019-21 (Doolar milyan).....	6
Tusaha 2: Dakhliga gudaha iyo kharashaadka dowladda, 2014-21 (Doolar milyan).....	6

JAANTUS

Jaantus 1: Dakhliga iyo kharashyada DFS, 2014 - 2021 (Doolar milyan)	7
Jaantus 2: Dakhliga iyo kharashyada billaha ah ee DFS, 2021 - 2022 (Doolar milyan)	9
Jaantus 3: Lacaga ay DFS ku wareejisay Dowlad Goboleedyada iyo Gobolka Banaadir 2018 - 2021 (Doolar milyan).....	9

SANDUUQYO

Sanduuq 1: Qoraallada la-talinta ee GMM iyo dib-u-eegista qandaraasyada 2021-22.....	5
Sanduuq 2: Hirgelinta barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka iyo ku guuleysiga deyn cafinta	8

LIFAAQYO

Lifaaq A: Horumarka oo la barbadhiyay hortabinada Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021	19
Lifaaq B: Qandaraasyada iyo Heshiisyada uu dib u eegay GMM ilaa 2014.....	21
Lifaaq C: Liiska hindise sharciyeedyada iyo heshiisyada uu soo celiyay Baarlamaanku markii uu dhamaaday muddo xileed-kiisa.....	24



ARAR

Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2022 waa warbixin-sannadeedkii lixaad ee Guddiga Maamulka Maaliyadda. Waxay soo bandhigaysaa aragtida wadajirka ah ee xubnaha Guddiga ee ku aaddan ho-rumarka maamulka maaliyadda ee Soomaaliya sannadkii la soo dhaafay, iyo hortabinada sanadka soo socda. Warbixinnadii hore waxaa laga heli karaa mareegaha Guddiga.¹

Waxaa mahad leh xoghaynta Guddiga ee ku aadan kaalintooda soo saarista warbixintaan.

¹ Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg bogga: <https://mof.gov.so/the-ministry/financial-governance-committee>



EREYO LA SOO GAABIYAY

GMM Guddiga maamulka maaliyadda
DFS Dowladda federaalka soomaaliya
US\$ Doolarka maraykanka



DULMAR KOOBAN

Guddiga Maamulka Maaliyadda (GMM) waxaa uu Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) madal wadahal iyo talo talooyin gaar ah oo ku saabsan arrimaha maamulka maaliyadeed ee xasaasiga ah. Doorarka GMM waa talo bixin keliya; ma laha awood fulineed. Heshiis kala dhexeeya DFS ayuu GMM wuxuu dib u eegis ku sameeyaa dhammaan heshiisyada iyo qanda-raasyada DFS, iyo dhammaan qandaraasyada wax soo iibsiga ee qiima ahaan ka sarreeya \$5 milyan. Warbixinta Maamulka Maaliyadeed ee sanadlaha ah waxay dib u eegis ku sameysaa ho-rumarka laga gaaray arrimihii uu GMM ka hadlay sannadkii la soo dhaafay.

Khataraha maamulka maaliyadeed inta lagu jiro xiliga kala guurka siyaasadeed

Waxa lagu waday in Soomaaliya ay ka dhacdo doorasho Febraayo 2021. Dib u dhacyo soo noqnoqday ayaa ku yimid jadwalka hannaanka doorashada oo ay sabab u ahayd khilaaf u dhexeeyay DFS, dowladaha xubnaha ka ah iyo mucaaradka ook u qotamay is afgarad la'aan ku saabsan nooca iyo habka doorashada. Xubnaha cusub ee Baarlamaanka kow iyo tobnaad ayaa ugu dambeyntii la dhaariyay Abriil 2022, Madaxweyne cusub ayaana muddo afar sano ah la doortay bishii Maajo 2022.

Hubanti la'aanta ka dhalatay muddada dheer ee kala guurka siyaasadeed waxay si weyn u kordhi-say khataraha maamulka maaliyadeed inta u dhexeysay 2021 iyo 2022. GMM wuxuu si dhow ula socday khatarahaan wuxuuna bixiyay siiyay DFS talooyin ah sidaa loo yareyn karo khata-rahaasi.

Cadaadis miisaaniyadeed oo daran

Ilihii taageerada miisanayadda ugu waa weynaa ayaa la hakiyay kadib markii la dhaafay xiligii doorashada loo qabtay ee bishii Febraayo 2021. Hoos u dhaca weyn ee dhaqaale ayaa cadaadis maaliyadeed oo ba'an ku abuuray DFS, taas oo aan haysan dakhli ku filan oo ay ku bixiso mushaaraadka iyo kharashaadka howlaha. Dakhliga gudaha ayaa daboolay in ka yar boqolkiiba konton wadarta qararahaadka dowladda sanadii 2021 ayadoo ay DFS DFS waxa soo wajahday hoos u dhac kharash lacageed oo bishiiba ah \$8 milyan.

Wasaaradda Maaliyadda waxay ku qasbanaatay inay hesho ilo kale oo maaliyadeed si ay u sii wado ku bixinta mushaaraadka iyo raashiinka laamaha amniga waqtigooda iyo inay ka fogaato in ay ku aruuraan deymo, si ku jaan go'an barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka. Wasaaraddu ma qaadan karin amaah dibadeed, wayna





xadidneyd awoodda kharash dhimista maadaama inta ugu badan ee kharashaadka guud ay yihiin mushaaraad.

Ugu horeyn, Wasaaradda Maaliyadda waxay ka faa'iidaystay taageerada miisaaniyadeed ee aan la is-ticmaalin laga soo bilaabo sanadii 2020 iyo iyadoo la baxday lacagihii hore loogu qoondeeyay koontada kaydka ku meel gaarka ah. Kadibna waxay amaah ku meel gaar ah ka qaadatay Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, sida uu oggol yahay Xeerka Bangiga. Wixii intaa ka dambeeyey, Wasaaradda Maaliyadda waxay wajahday xaqiiqda ah in aysan awoodin in ay sii wado bixinta mushaaraadka si buuxda. Qoondaynta Caalamiga ah ee Heyadda Lacagta Aduunka ee loo yaqaanno SDR oo ay si lama filaan ah u heshay Dowladda Soomaaliya ayaa ka yareysay cadaadiska maaliyadeed. Lacagahaasi waxaa loo isticmaalay in ay Wasaaradda ku bixiso amaahdii laga soo qaday Bangiga Dhexe iyo khidmadda dulsaarka ee deymaha Bangiga Aduunka, kadibna inta hartay waxaa si siman u qeybsaday Wasaaradda Maaliyadda iyo Bangiga Dhexe. Tani waxay ku caawisay DFS dhaqaale ku filan oo ay ku dabooshay hoos udhaca billaha ah ee ilaa 6da bilood hore ee sanadka 2022.

Ayadoo ay DFS qaaday talaaboyinkaasi sare ku xusan, hadana kharashaadka ka baxsan mushaaraadka ee la siiyo hay'adaha DFS ayaa aad loo xaddiday sanadkii 2021 iyo bilowgii 2022. Lacagihii ay DFS siin jirtay dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS iyo Gobolka Banaadir ayaa sidoo kale aad loo dhimay, taasi oo keentay hoos u dhac bixinta mushaaraadka iyo kharaashaadka kale, ayadoo si gaar ah aad looga dareemay dowlad goboleedyada cusub ee aanan heysan ilo dhaqaale oo ku filan. Cadaadiska ku yimid maalgelinta hay'adaha DFS iyo lacagii ay heli jireen ay dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS way sii socon doontaa inta ka harsan 2022.

Maamulka cusub ee DFS wuxuu u baahnaan doonaa inuu isfaham la gaaro deeq bixiyayaasha bixiya taageerada miisaaniyadeed, si ay awood ugu yeeshaan dib u soo celinta taageerada miisaaniyada hadii kale maamulka cusub ma awoodi doono inuu ku bixiyo mushaaraadka waqtigii loogu talagalay ama gabi ahaanba dhowr bilood gudahood.

Dib-u-Dhaca Dib u Habeynta

Qaar ka mid ah barnaamijka dib u habeynta dhaqaalaha DFS ayaa hergelintooda sii socotay ayadoo ay jirtay hubanti la'aan siyaasadeed. Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka ayaa soo gabagabeeyey xisaab-xirka DFS 2020, baarista hufnaanta 24 hay'addood oo DFS ah, iyo laba xisaab xir gaar. Bangiga

dhexe ayaa horumar ka sameeyay dib-u-habaynta waaxda maaliyadda, oo ay ka mid yihiin shati siinta shirkadaha bixiya adeega lacagaha taleefanada la isugu diro, fulinta nidaamka lacag bixinta qaranka, dhisidda nidaamka lacag isu diridda. Wasaaradda Maaliyadda waxay horumar ka samaysay Nidaamka Casriyeynta Furdooyinka, waxayna sii waday howlaha sare u qaadidda dakhliga isgaarsiinta.

Dib-u-habeenadi kale ayaa la hakiyay. Wada tashiyadii dib-u-eegista ee Dastuurka ee la soo jeediyay ayaa istaagay tani iyo horaantii 2020. In ka badan labaatan hindise sharciyeedyo ayaa lagu soo celiyay Golaha Wasiirada ka dib markii uu dhamaaday muddo xileedka Baarlamaanka, waxaana ka mid ah sharciyo muhiim u ah maamulka maaliyadda sida Hindise-sharciyeedka lagu canshuurayo kheyraadka la qoto Hindise Sharciyeedka Beegsiga Cunaqabataynta Maaliyadeed.

Dib u dhacyada doorashada ayaa tijaabiyay awooda sharciyada maamulka maaliyadda. DFS ayaanan awood u yeelan in Miisaaniyadda 2022-ka ay horgeeyso Golaha Shacabka si ay u ansixiyaan ka hor inta uusan bilaaban sanad xisaabeedka, sababtoo ah waqtiga baarlamaanka ayaa ka dhacay. Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud kuma jiro qodob ka hadlaya sii wadidda kharash bixinta muddo sagaashan cisho kadib sanad xisaabeedka. Golaha Wasiirada ayaa ansixiyay miisaaniyad ah rubuc labaad ee sanadka, Madaxweynahana waxuu ku ansixiyay digreeto.

Dib u dhaca doorashada ayaa sidoo kale iftiimiyay dhawr arimood oo la xiriira xeerarka xiliga ka guurka oo aad ugu baahnaan lahaa bidhaamin. Kuwaas waxaa ka mid ah xaaladaha maamulka waqtigiisu dhamaanayo uu ku geli karo heshiisyo cusub ama uu ku magacaabi karo shaqaale cusub.

Dib u dhacyada doorashada ayaa sidoo kale geliyey halis hirgelinta barnaamijka ka dhexeeyey DFS iyo Hey'adda Lacagta Aduunka maadaama ay Hey'addu dhameystiri kari weysay dib ueegista barnaamijka 17 ka Maajo 2022. Guddiga Hey'adda Lacagta Aduunka ayaa ansixiyay muddo kordhin hal mar oo saddex bilood ah oo dib u eegis lagu sameeyo. Barnaamijkawaa la baabi'in doonaa hadii

aan dib u eegista la dha-maystirin 17 ka Agoosto 2022. Arrintaas waxa ay dib u dhigaysaa heshiiska taageerada miisaaniyada, waxayna sii xumaynaysa cadaadiska miisaaniyadeed ee hadda jira, waxayna sidoo kale dib u dhigeysaa deyn cafinta.

Hababka liita ee qandaraas bixinta

Xilliga kala-guurka doorashada oo daba-dheeraaday ayaa sare u qaaday khatarta ah inuu xumaado hababka lagu bixiyo qandaraasyada. Si loo yareeyo khatarta ah in hay'adaha DFS inay isku dayaan inay bixiyaan qandaraasyo ka hor isbeddelka maamulka, ayuu Madaxweynahu uu soo saaray wareegto ka mamnuucaysa dhammaan hay'adaha DFS in ay heshiisyo la saxiixaan shirkadaha caalamiga ah inta laga gudbayo doorashada.

Balse GMM wuxuu ogaaday isku dayo dhowr ah oo ay sameeyeen hay'adaha DFS si ay u bixiyaan heshi-isyo qandaraas loo tartamin, lana raacin shuruudaha sharciga iibka. Wasaaradda Dekeduhu waxay soo jeedisay in la bixiyo qandaraas diiwaan-gelinta maraakiibta iyo shahaado-siin ah oo aan loo marin habraacyada qandaraas-bixinta. Wasaaradda Ganacsigu waxay isku dayday inay ku bixiso qandaraas adeega qiimaynta waxyaabaha la soo dhofiyo si xulitaan xiran. Talooyin sharci uu Garyaqaanka Guud ee Qaranka ayaa u muuqday inay ogolaanayeen talaabooyinkaasi, inkastoo uusan xafiiskiisu awood ku la-hayn inuu ka leexdo qodobada sharciga iibka qaranka. Ka dib markii ay arrinta ay soo farageliyeen Wasaaradda Maaliyadda iyo Hanti-dhowrka Guud, qandaraasyadaasi midna lama saxiixin.



Shati siinta shidaalka iyo gaaska ayaa ahaa heshiiska ugu dhibka ugu badan ee aan la saadaalin karin xiliga kala guurka. Bishii Nofeembar 2022, Wasaaradda Bartoolka ayaa Gudigga Wasiirada ee Qandaraasyada u gudbisay Heshiiska Wax-soo-saar Wadaaga la raaci karo si ay u ansixiyaan sida uu qabo sharciga Soomaaliya. Heshiiska Wax-soo-saar Wadaaga waxaa loogu tala galay inuu taageero shati bixinta shi-daalka iyo gaaska. Ka hor inta aan la soo furin shati bixinta shidaalka iyo gaaska ayuu Bishii Febraayo 2022, Wasiirka Bartoolka ayaa si lama filaan ah ugu dhawaaqay in si toos ah Shirkadda Coastline la siiyay 7 xirmood oo Wax-soo-saar Wadaag shidaal iyo gaas ah.

Heshiiska Wax-soo-saar Wadaaga wuxuu ka dhigay faa'iidada lahaanshaha mid aad u hooseysa oo ah boqolkiiba shan. Sidoo kalena qaybsiga faa'iidadana laguma go'aaminin, qandaraaslayaasha waxaa laga doonayaa inay soo gudbiyaan saami qaybsiga faa'iidada ay soo jeedinayaan, taasoo qayb ka noqonaysa dalabkooda mar kasto oo shati la bixinaayo. Kororka faaiidada ay helayso DFS wuxuu ku xiran yahay in ay bataan tartannada shati bixinta wax soo saarka. GMM ma uusan arkin nuqul ka mid ah heshiiska ay Wasaaradda Bartoolka la gashay Coastline. Sidaa darteed Gudiiga ma uusan awoodin inuu qiimeyn ku sameeyo hadii uu yahay mid ilaalinaya danaha DFS oo ku salaysan tartan furan.

In kasta oo uu Sharciga Bartoolka siinayo Wasiirka Bartoolka awood uu ku saxiixo Heshiiska Wax-soo-saar Wadaaga, hadana habka soo bandhigidda, gorgortanka, iyo bixinta Heshiiska Wax-soo-saar Wadaaga waa inuu waafaqsanaadaa dhammaan sharciyada kale ee la xiriira. Wasaaradda Bartoolka kama aysan codsan ogolaanshaha Guddiga heer wasiir ee qandaraasyada si ay wada xaajood toos ah ula gasho Coastline, sida uu dhigayo sharciga wax soo iibsiga, sidoo kale lama wadaagin warbixinta qi-imaynta ee ku talinaysa qaybsiga wax soo saarka kasta Guddiga ka dib gorgortanka qandaraaska.

Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha ayaa diiday qandaraaska la siiyey Coastline, iyadoo loo cuskaday in aan la fasaxin, isla markaana aan loo marin habkii sharciga ahaa ee looga baahnaa. Hanti dhowrka guud ayaa cadeeyay in saxiixa qandaraaskaas uu baal maray sharciyo iyo xeerar kala duwan. Wasaaradda Arrimaha Dibadda ayaa ogeysiis rasmi ah u dirtay

Coastline oo ahaa in DFS ay u aragto heshiiskaas mid aan waxba ka jirin. Balse Coastline ayaa sheegtay in heshiiska uu yahay ansax.

Hortabinada Maamulka cusub



Sii wadida dib-u-habaynta dhaqaalaha iyo maaliyadda

Dowladda cusub wuxay u baahan tahay inay si degdeg ah heshiis ah sii socoshada barnaamijka deyn cafinta la gasho Heyada Lacagta Aduunka. DFS waa inay samayso balan qaadyo la xiriira dakhliga gudaha, dheelitirka maaliyadeed, ka hortagidda aruurka deymo cusub, ama dulsaar. Fulin lagu qanci karo oo ah Barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka ayaa shuruud u ah taageero miisaaniyadeed ka timaada deeq bixiyayaasha waa weyn.

Sidoo kale Wasaaradda Maaliyadda waa inay diiradda saartaa abaabulka dakhliga iyo mudnaan siinta kharashaadka qeybaha muhiimka ah. Maamulka cusub waa in uu iska ilaaliyaa cadaadiska siyaasadeed oo ah debcinta dib-u-habaynta dakhliga ama inuu ogolaado mudnaan siinta kharashyo cusub. Waa in uu ka fogaato balaarinta mushaarka ee aan daruuriga ahayn.

Ballanqaadka Nidaam Cadaaladeed ee libka iyo Qandaraasyada

Waxaa muhiim ah in hogaanka cusub ay si cad oo degdeg ah uga go'an tahay hannaanka hufan ee bixin-ta qandaraasyada wax iibsiga qaran iyo heshiisyada qandaraas. Ra'iisul Wasaaraha waa inuu dhammaan Wasiirada iyo Hay'adaha DFS ku baraarujiyaa Shuruudaas. Wasaaradda Maaliyadda waa in ay soo saar-to wareegto sharraxaysa

habraacyada tartanka iyo kormeerka ee khuseeya wax iibsiga qaran iyo heshiisyada.

Maamulka cusub waa in uu sii wadaa hababka hadda jira ee ah in hay'adaha DFS ay la shaqeeyaan Waaxda Iibka ee Wasaaradda Maaliyadda marka ay sameynayaan wax soo iibsi qiimo sare leh iyo marka ay sameynayaan heshiisyo qandaraas. Waa inay sidoo kale dowladdu muujisaa sida ay uga go'an tahay wax-soo-iibsi tartan furan ah iyadoo si degdeg ah u bilaabaysa tartanka cusub ee loogu talagalay qandaraasyada raashinka iyo shidaalka ee laamaha amniga.

Maamulka cusub wuxuu u baahan doonaa inuu fiiri gaar ah u yeesho qandaraasyada shidaalka iyo gaaska. Wasaaradda Batroolka iyo Heyadda Batroolka Soomaaliyeed waa inay diyaariyaan shati bixin hufan oo ah saliidda iyo gaaska oo lagu tartamo, kasoo buuxiya dhammaan shuruudaha

sharci ee DFS. Heyadda Batroolka ee Soomaaliyeed waa inay kaliya gashaa wada xaajood toos ah oo ku saabsan heshi-isyada saliidda iyo gaaska ka dib soo bandhigiida shatiyada, marka loo ogolaado inay gasho gorgortan toos ah sida sharcigu dhigayo kana mid yahay sharciga iibka. Dowladd cusub waxay u baahan doontaa in ay ka shaqeyso sidii loo xalin lahaa muran kasta oo sharci ah oo ka dhasha baabi'inta toddobada xirmo ee lala galay shirkadda Coastline.

Ugu dambayntii, Dowladda cusub waa in ay sidoo kale ku dadaashaa mustaqbalka in ay ka hortagto soo noqnoqosho dhibaatooyinkii lagala kulmay isbedelkii ugu dambeeyay ee xilligii kala guurka, iyada oo la samaynayo qeexitaan tafatiran oo ku saabsan 'waajibaadka caadiga ah' ee laga yaabo in ay qabsato dawladaha xil-gaar-siinta, iyo sidoo kale xeerar cad oo ku saabsan qandaraasyada xilliyada ka horreeya waqtiga doorasha.





1. HORDHAC

Kaalinta Guddiga Maamulka Maaliyadda (GMM)

Guddiga Maamulka Maaliyadda waxaa la aasay horraantii sanadkii 2014-kii, waxaana lagu dhisay heshiis ay wada gaareen Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) iyo Beesha Caalamka. Ujeedada Gud-diga waa inuu DFS siiyaa madal wadahadal iyo talo gaar ah oo ku saabsan arrimaha maamulka maaliya-deed ee xasaasiga ah. Talada Guddiga Maamulka Maaliyadda waxay isugu jirtaa arrimaha maaliyadda, qandaraasyada iyo heshiis bixinta, maareynta kheyraadka dabiiciga ah, iyo maamulka bangiga dhexe. Kaalinta Guddiga waxay ku kooban tahay tala bixin kaliya, malah awood fulin. Si kastaba ha ahaatee, heshiis ahaan, wuxuu dib

u eegis ku sameeyaa dhammaan heshiisyada iyo qandaraasyada DFS, iyo dhammaan qandaraasyada wax soo iibsiga ee qiima ahaan ka sarreeya \$5 milyan.²

Guddiga wuxuu u kulmaa si joogto ah³, wuxuuna siiyaa talooyin DFS, iyada oo la adeegsanayo wada-hadal, ka-qaybgalka daneeyayaasha, qoraalo latalin rasmi ah iyo caawin farsamo. Jiritaanka GMM wuxuu beesha caalamka siinayaa dammaanad qaadka in DFS ay hesho talooyin khabaro oo la isku halayn karo oo ku saabsan arrimaha siyaasadda maamulka maaliyadda iyo qandaraasyada waaweyn. Rajada guud ee ay qabaan ayaa ah in DFS ay tixgalin weyn siin doonto talada GMM, ayna ku dadaali doonto sidii loo dhaqan gelin lahaa haddii aysan jirin sabab

² Heshiisyada waxay tixgalin siiyaan hantida guud hay'ad gaar ah muddo cayiman iyadoo lagu beddelayo khidmad, royalty, ama tixgalin kale, halka qandaraasyada wax soo iibsiga ay xukumaan iibsashada alaabta, shaqooyinka, iyo adeegyada dadweynaha.

³ Guddiga FGC waxay qabatay 54 shir tan iyo 2014kii

la taaban karo oo aan loo fulin karin. Sii socodka shaqada GMM waxay ahayd tilaabo ilaalinaaya heshiiska taageerada miisaaniyada ee u dhexeeya DFS iyo Midowga Yurub.

GMM ayaa waxaa guddoomiye u ah Wasiirka Maaliyadda iyo xubnaha kale ee DFS ka mid ah Guddoo-miyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo wakiilada xafiisyada Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha⁴. Madaxda kale ee ka tirsan DFS ayaa ka soo qeybgali kara marka lagu casuumo. Xubnaha caalamiga ah ee GMM waxay matalaan Sanduuqa Lacagta Adduunka, Bangiga Horumarinta Afrika, Bangiga Adduunka iyo Saaxiibada horumarinta laba geesoodka ah (oo ay ku jirto EU). GMM waxuu helaa khabiir taageero oo laga helayo La-taliye dhanka heshiisyada oo heegan u ah iyo Xoghaynta. Maalgelinta howlaha GMM waxaa bixiya Bangiga Adduunka⁵ iyo Midowga Yurub.

Wadahadallada kulamada GMM waa kuwa qarsoodi ah, laakiin nuxurka kulamada waxaa lagu daabacaa mareegaha Wasaaradda Maaliyadda kadib kulanka.⁶ Qoraallada la-talinta GMM waxaa laga yaabaa in loo bandhigo daneeyayaasha marka uu go'aan ka gaaro Shir Guddoomiyaha. Xubnaha caalamiga ah ee GMM waxay si joogto ah uga warbixiyaan beesha caalamka shaqada GMM iyo arrimaha soo kordhaba.

GMM waxaa marka hore loo asaasay in uu jiro muddo labo sano ah. Muddo xileedkooda waa loo cus-boonaysiiyaa sanad walba, iyadoo la raacayo heshiiska ay wada gaareen DFS iyo beesha caalamka. Sii socoshada howlaha GMM marka uu dhamaado maamulka hadda jira ee DFS, wuxuu u baahnaa doonaa heshiis ay gaaraan maamulka imaan doona iyo beesha caalamka.

Ujeedada Warbixinta Maamulka Maaliyadda

Warbixinta Maamulka Maaliyadeed ee sanadlaha ah ee Guddiga ayaa dib u eegeysa horumarka laga gaaray arrimaha uu GMM ka hadlay sanadkii hore. Warbixintu iskuma dayeyso in ay bixiso warbixin dhamaystiran oo ku saabsan dhammaan arrimaha dhaqaalaha iyo maamulka maaliyadda ee Soomaaliya, marka laga reebo kuwa uu ka hadlay GMM. Mararka qaar, Warbixinta waxaa sidoo kale ku jira cutub loogu magac daray 'Diiradda' kaa soo si qoto dheer uga hadlaya mowduuc ku saabsan maamulka maal-iyadeed ee GMM uu daneynayo, u kuur galidda casharada la bartay muddo sannado badan ah, caqabadaha joogtada ah ee saamaynaya horumarka, iyo hortabinada dib u habayn ee imaan kara.⁷

Maadaama 2022 uu yahay sanad kala guur, Warbixinta 2022 waxa ay ku kooban muddada ka soo bilaabanaysa Luulyo 2021 ilaa dhammaadka maamulka hadda jira ee DFS, halkii uu ka ahaan lahaa laba iyo toban bilood oo go'an. Cutubka 2aad waxa uu diiradda saarayaa khataraha maamulka maaliyadeed ee soo ifbaxay intii lagu jiray xiliga kala-guurka siyaasadeed iyo in dib loo milicsado casharradii laga bartay. Cutubka 3aad waxa uu tilmaamayaa hortabinada maamulka maaliyadeed ee waaweyn una baahan feejignaan hore iyo waxqabadka maamulka imaanaya.


Lifaaqa A waxa uu sheegayaa dulmar guud oo ku saabsan horumarka laga sameeyay hirgelinta hortabinadii lagu asteeyey warbixinta 2021. Lifaaqa B waxa uu faahfaahin ka bixinayaa dhammaan qandaraas-yada iyo heshiisyada uu GMM dib u eegista ku samaysay tan iyo 2014. Lifaaqa C waxa uu tilmaamayaa liiska sharciyo qabyo ah oo Baarlamaanku dib ugu soo celiyay Golaha Xukuumadda kadib markii uu dhammaaday muddada Baarlamaanka.

⁴ Guddoomiyaha Guddiga Miisaaniyadda ee Golaha Shacabka iyo Garyaqaanka Guud ayaa sidoo kale ah xubno loo mag-acaabay GMM, balse aan ka qeyb gelin shirarka sanadihii ugu dambeeyay.

⁵ Maalgelinta Bangiga Adduunka ee GMM waxa lagu bixiyaa Sanduuqa Saaxiida Soomaaliya, kaas oo ay maalgeliso EU, Finland, Jarmalka (KfW), Denmark, Norway, Sweden (Iskaashiga Horumarinta Caalamiga ah ee Iswidhan), Boqortooyada Ingiriiska, Talyaaniga, Switzerland (Wakaaladda Horumarinta ee Swiss), Maraykanka (Wakaalada Horumarinta Caalami-ga), iyo Bangiga Adduunka.

⁶ Macluumaad dheeraad ah ka eeg website-ka: Warbixinnada Maamulka Maaliyadda | Wasaaradda Maaliyadda – Soo-maaliya (mof.gov.so)

⁷ 2020-ka Warbixinta waxa ku jiray cutubka iftiiminta ee wax-soo-iibsiga iyo heshiisyada DFS, halka 2021-ka FGR uu ku jiray cutubka Diiradda ee hagaajinta la-qabsiga waaxda ee dib-u-habaynta maamulka maaliyadda.



2. KHATARAHA MAAMULKA MAALIYADEED INTA LAGU JIRO XILIGA KALA GUURKA SIYAA-SADEED, LUULYO 2021 ILAA MAY 2022

Dib u dhaca doorashada

Waxa lagu waday in Soomaaliya ay ka dhacdo doorashada ka hor dhamaadka xilliga maamulka federaalka ee afarta sano ah, kuna ekayd 8-da Febraayo 2021. Si kastaba ha ahaatee, dib u dhacyo soo noqnoqday ayaa ku yimid jadwalka hannaanka doorashada. Dib u dhacyada ayaa markii hore ka dhas-hay is afgarad la'aan ku saabsan nooca doorashada. Bishii Febraayo 2020, Madaxweyne Farmaajo ayaa saxiixay sharciga

doorashada kaasoo u gogol xaarayey in doorasho qof iyo cod ah dhacdo. Balse xeer-kan ayaa lagu dhaliilay in uusan faahfaahin arrimaha ay ka midka yihiin qeexidda deegaanada iyo tirada kuraasta loo qoondeeyay deegaan kasta⁸. Guddoomiyaha guddiga madaxa banaan ee doorashooyinka qaranka ayaa tilmaantay in diyaarinta doorasho qof iyo cod ah ay qaadan doonto wax ka badan laba iyo toban bilood⁹, iyadoo tilmaantay in loo baahan yahay muddo kororsi, si loo dhamaystiro hannaanka doorashada.

⁸ Heritage-Institute-Policy-Brief-on-the-2020-Election.-English.pdf (heritageinstitute.org)

⁹ Impossible to hold 2020 polls - Somalia elections boss | Africanews.

Dib u dhacyadaas ayaa sababay xiisado siyaasadeed oo ka dhex dhacay Madaxweynaha iyo dhowr dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS, khilaafki siyaasadeed oo soo kala dhex galay Madaxweynaha iyo Ra'iisal Wasaarihiisa Xasan Cali Kheyre kaas oo markii dambena is casilay kadib markii uu Baarlamaan-ku kalsoonida kala noqday bishii Luulyo 2021. Madaxweynaha ayaa bishii Agoosto 2021 u magacaabay Ra'iisal Wasaare cusub Maxamed Xuseen Rooble, wuxuuna u igmaday inuu xaliyo ismari waaga dooras-hada. Bishii Sebtembar 2020, DFS waxay heshiis kula gashay dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS in doorashadu ay u dhacdo qaab dadban halkii ay ka ahaan lahayd qof iyo cod¹⁰, lana soo gebagebeeyo Febraayo 2021. Hase yeeshee, heshiis la'aanta DFS, dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS iyo xisbi-yada mucaaradka oo ku saabsanayd habka loo maareynayo doorashada dadban, waxay noqotay in aan la qaban doorasho ka hor dhammaadka xilliga maamulka ee afarta sano ah ee ku ekaa Febraayo 2021. Sidaa darteed, maamulki jiray xafiiska ayuu sii joogay.

Bishii Abriil 2021, Madaxweynuhu waxa uu taageeray soo jeedin ay soo jeediyeen qaybo ka mid ah xildhibaanada oo ahaa in muddo kororsi laba sano ah loo siiyo dowladda, si loogu diyaar-garoobo doorasho qof iyo cod ah. Soo jeedintaas ayaa la kulantay mucaaradad baahsan, waxayna abuurtay khilaaf siyaasadeed oo u dhaxeeya Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha. Xildhibaanada ayaa intaa ka-dib ka laabtay soo jeedintooda kadib codsi ka yimid Madaxweynaha, Waxaana la ogolaaday in dib loo bilaabo doorashada dadban. Si kastaba ha ahaatee, hirgelinta doorasho dadban ayaa dib u dhac waxa ku keenay khilaafyada siyaasadeed. Ugu dambeyn bishii

Oktoobar 2021 Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha ayaa ku heshiiyey in la dardargeliyo howlaha doorashada si loo soo gebagebeeyo doorasha-da bisha Diseembar 2021-ka.

Siduu qorshuhu ahaa doorashada lama soo gabagabeyn dhamaadka December 2021, taasoo ka dhalatay dib u dhac ku yimid qabanqaabada doorashada Aqalka Hoose. Xubnaha cusub ee Baarlamaanka kow iyo tobnaad ayaa ugu dambeyntii la dhaariyay 14 ka Abril 2022, doorashada Madaxweynahana waxaa la qabtay 15 ka Maajo 2022 in ka badan 20 bilood kadib heshiiskii hore ee doorashada ee u dhexeeyey DFS iyo dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS ee la saxiixay Siteembar 2020.

Hubanti la'aanta ka dhalatay muddada dheer ee kala guurka siyaasadeed waxay si weyn u kordhisay khataraha maamulka maaliyadeed inta u dhexeysay 2021 iyo 2022. GMM wuxuu tilmaamay soo ifbaxa saddex khatarood oo waaweyn:

- Cadaadis miisaaniyadeed oo daran
- Dib-u-dhacyada dib-u-habaynta
- Hababka liita ee qandaraas bixinta

GMM wuxuu si dhow ula socday khatarahaas, wuxuuna talooyin joogto ah ka siiyay DFS sidii loo yarayn lahaa khatarahaas. Taloyinkiisa waxa si gaar ah diiradda loog saaray ka hortagga bixinta qandaraasyo aan sharci waafaqsanayn. Waxyaabaha uu GMM sida rasmiga ah u soo saaray waxa ka mid ahaa qoraal-lo talo bixin ah iyo dib u eegista qandaraasyo (Sanduuqa 1aad). Caqabadaha iyo horumarka ugu waaweyn ee ku xiran mid kasta oo khatarahaas ka mid ah ayaa hoos lagaga hadlay.

¹⁰ Hannaanka doorashada dadban ee Soomaaliya ayaa waxay tahay soo xulista 54 xubnood oo Aqalka Sare ah (Senate) iyo 275 xubnood oo Aqalka Hoose ah (Golaha Shacabka). Kuraasta waxaa loo qoondeeyay qaab qabiil/jufo, waxaana odayaasha beeshu ay taageerayaan magacaabista musharixiinta u tartameysa kursi kasta. Musharixiinta Aqalka Hoose waxaa dooranaya ergo ka kooban 101 codbixiye, halka xubnaha Senate-ka ay u codeeyaan baarlamaannada maamul gobol-leedyada. Marka la soo doorto dhammaan wakiilada Aqalka Hoose iyo Sare, way kulmayaan si ay u soo xulaan Gud-doomiyeyaasha Aqalladooda. afhayeennada laba aqal ayaa markaa qabanqaabiya habraaca doorashada Madaxweynaha.

Xubanaha Caalamiga ah ee ka tirsan GMM waxay diyaariyeen 8 qoraalo talobixin ah oo lagaga dooday 2dii shirarkii ee la qabtay intii u dhaxaysay Luulyo 2021 iyo Maajo 2022.

- Casharradii laga bartay 2021-kii tartanadi raashiinka yo shidaalka ee laamaha amniga (Luulyo 2021)
- Faahfaahin ugu dambaysay oo ku saabsan Codsii Soo Jeedinta Hay'adda Dhawrista Tayada ee Soomaaliyeed (Luulyo 2021)
- Soo jeedinta Hay'adda Duulista Rayidka ah ee Soomaaliya ee loogu talagalay in lagu balaariyo baaxadda hindisaha qabyada ah ee ururinta dakhliga duulista hawada ee aan la bixin, si loogu daro horumarinta iyo maaraynta ni-daamka cusub ee oggolaanshaha gelitaanka (Nofembar 2021)
- Codsii soo Jeedinta Hay'adda Dhawrista Tayada ee Soomaaliyeed iyo Qandaraaska Qabyada ah oo dib loo eegay: 14 Oktoobar 2021 (Nofembar 2021)
- Dib-u-eegistii Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaga ee Batroolka ee la ansixiyay Nofambar 2021 iyo tillaabooyinkii xigay ee Shatiga Saliidda iyo Gaaska (Disembar 2021)
- Dib u eegistii Codsii Soo Jeedintii qabyada ahayd iyo Qandaraas bixinta adeega qiimaynta waxyaabaha la soo dhoofiyo (dib loo eegay 18 Nofembar 2021) (Disembar 2021)
- Dib-u-eegis lagu sameeyo heshiiska qabyada ah ee qandaraas ahaana loo soo jeediyay ee shahaado siinta iyo dii-waangelinta ee maraakiibta badda (Disembar 2021)
- Tallaabooyinka xiga ee tartanka furan, gorgortanka iyo bixinta Heshiisyada Wadaagga Wax-soo-saar ee Qaybta Shidaalka (Maarso 2022)

Cadaadis miisaaniyadeed oo daran



Sanadkii 2020 DFS waxa ay heshay taageero miisaaniyadeed oo gaareysa \$180 milyan oo u dhiganta boqolkiiba 60 dhammaan kabka miisaaniyadda sanadkaas ee taageerada deeq-bixiyayaasha.

Taageeradii waxay u sahashay DFS, inay ku dhinto saamaynta dakhliga ee Covid-19 sanadka 2020 iyo inay siiso maalgalin dheeri ah dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS¹¹. Dib u dhaca ku yimid hanaanka doorashada ayaa saameyn ku yeeshay taageerada miisaaniyadeed ee ay saaxiibada caalamiga ah u fidin lahaayeen DFS sanadyada 2021 iyo 2022. Markii la haleeli waayey in la qabto doorashada 2020, ilihii ugu muhiimsan ee taageerada miisaaniyada (oo ka imaan jiray Midowga Yurub iyo Bangiga Adduunka) waa la hakiyey. Taageerada miisaaniyada ee soo gashay DFS sanadkii 2021 waxay gaaraysay \$38.4 milyan, oo ugu horrayn ka timid Baanka Adduunka gaar ahaan mashuurca Maalgelinta Qiimaha Joogtada ah, waxaana lagu kabay \$2.5 milyan oo ka timid Dawladda Turkiga (Tusaha 1 aad).

Taageerada miisaaniyada soo gashay labadii bilood ee ugu horeysay 2022 waxay gaaraysay \$5.3 milyan.

¹¹ DFS ayaa \$23 milyan ku wareejiyay shan dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS iyo Maamulka Gobolka Banaadir bishii Sebtembar 2020 si ay u yareeyaan saameynta COVID-19 uu ku yeeshay dakhli. Qoondayntan waxa lagu maalge-liyay taageerada miisaaniyada ee ka timid Baanka Adduunka.

TUSAHA 1 Taageerada miisaaniyadeed ee la siiyay DFS 2019-21 (Doolar milyan)

Dalka/hay'adda bixiyaha	2019	2020	2021	2022 (to end March)
Turki	15.0	15.0	2.5	
Aljeeriya	0.1			
Qadar	21.3			
Midowga Yurub	29.1	7.7		
Bangiga Aduunka – RCRF (taageerada miisaaniyada)	23.3	30.4	35.9	6.3
Bankgiga Aduunka – DPO		100.4		
Bangiga Horumarinta Afrika		26.2		
Wadar	88.8	179.7	38.4	6.3

Xigasho: Wasaaradda Maaliyadda

Hoos u dhaca weyn ee ku timid taageerada miisaaniyadda ee soogashay dowladda 2021 iyo labada bi-llood ee ugu horraysay sanadka 2022 ayaa cadaadis maaliyadeed oo ba'an ku abuuray DFS, taas oo aan haysan dakhli ku filan oo ay ku bixiso mushaaraadka iyo kharashaadka shaqada. Dakhliga gudaha ee DFS ayaa kordhay 170 boqolkiiba intii u dhaxaysay 2014 iyo 2021, laakiin kharashaadka mushaaraadka ee DFS ayaa iyana kordhay 220 boqolkiiba isla muddadaas. Markii la gaaray 2020 DFS waxa ay ku tiirsaneyd maalgelinta taageerada miisaaniyadda, si ay awood ugu yeelato in ay si buuxda u bixiso mus-haaraadka, iyo in ay daboosho kharashaadka kale dhammaan ee asaasiga u ah shaqadeeda. Kororka kharashaadka mushaaraadka ee DFS waxa qayb ahaan sabab u ahaa mushahar u kordhinta shaqaalaha laamaha amniga ka dib markii la dhamaystiray hawsha diiwaan gelinta

faraha. Dhisidda wakaalado badan oo madax banaan ah ayaa sidoo keenay balaarinta baaxadda dawladda¹². Nidaamka mushaar bixinta ee DFS ayaan la soconin kororka kharashaadka mushaaraadka, ku dhawaad saddex meelood meel kharashaadka mushaaraadka ayaan ka muuqan liiska mushaar bixinta.


Sanadkii 2021 kharashaadka mushaaraadka DFS waxa uu \$20 milyan kor u dhaafay dakhli ururinteeda gudaha, ayaada uu dakhliga gudaha ilaa xad ka soo kabsaday saamayntii Caabuqa Covid-19 uu ku yeeshay dhaqaalaha. Si guud dakhliga gudaha waxa uu taageeray wax ka yar boqolkiiba konton wadarta kharashka dawladda ee sanadkii 2021. (Tusaha 2, Jaantuska 1). DFS waxa soo wajahday hoos u dhac kharash lacageed oo bishiiba ah \$8m.

TUSAHA 2 Dakhliga gudaha iyo kharashaadka dowladda, 2014-21 (Doolar milyan)

	2014	2015	2016	2017	2018	2019	2020	2021
Dakhliga gudaha	84.3	114.3	112.7	142.6	183.4	229.7	211.2	229.6
Kharashaadka Mushaaraadka DFS	77.2	55.4	55.1	124.6	142.4	162.4	227.0	250
Kharashaadka guud DFS	151.1	135.5	171.1	245.4	286.1	315.5	494.7	473.8
Dakhliga gudaha inta uu boqolkiiba ka yahay kharashaadka mushaharka	109%	206%	204%	114%	129%	141%	93%	92%
Dakhliga gudaha inta uu boqolkiiba ka yahay wadarta guud ee kharashaadka	56%	84%	66%	58%	64%	73%	43%	48%

Xigasho: Wasaaradda Maaliyadda

¹² Arrintan ayaa si qoto dheer looga hadlay 2021 FGR cutubka Diiradda ee hagaajinta la-qabsiga waaxaha ee dib-u-habaynta maamulka maaliyadda. Waxay xustay in Miisaaniyadda 2021-ka ee DFS ay ku jirto qoondaynta 18 hay'adood oo madax-banaan (\$ 29 milyan, 11 boqolkiiba dakhliga DFS), iyadoo 16 kale oo wakaalad oo cusub ay ku jiraan.

Jaantus 1: Dakhliga iyo kharashyada DFS, 2014 - 2021 (Doolar milyan)

Xigasho: Wasaaradda Maaliyadda

Wasaaradda Maaliyadda ayaa si weyn ugu baraarugsanayd muhiimadda ay leedahay ku bixinta mushaaraadka iyo kharashaadka asaasiga waqtigooda. In ka badan boqolkiiba konton wadarta kha-rashaadka mushaarka waa kharashaadka laamaha amniga. Bixin la'aanta mushaaraadka laamaha amniga ayaa saameyn taban oo degdeg ah ku yeelan karta xaaladda amni ee Soomaaliya. Bixinta joogtada ah ee lacagaha ganacsatada keenta shidaalka iyo raashinka laamaha amniga ayaa sidoo kale muhim ah, sababtoo ah muhiimad ay u leeyihiin howlaha amniga.

Waxa intaa dheer, in lagu guuldaraysto ku bixinta mushaaraadka waqtigooda ama buuxinta waajibaadyada qandaraasyada kale, waxay halis gelinayaan hirgelinta barnaamijka DFS kala dhaxeeyo Heyad-da Lacagta Aduunka iyo sidoo kale waxay sababayaan dib u dhigista helitaanka deyn cafinta. Marka la eego shuruudaha barnaamijka Taageeridda Deyn Cafinta ee Heyadda Lacagta Aduunka ee soo bilowday Maarso 2020, DFS waxa ay go'aansatay in aanay ku ururin kharashyada deynta aan la bixin. Haddii DFS ku uruuraan deymo oo ay bixin weydo mushaaraadka waqtigii loogu talagalay,¹³ ama ay ku guuld-areysato inay ka soo baxdo waajibaadka kale ee heshiiska sida bixinta lacagaha raashinka iyo shidaalka la siiyo laamaha amniga, barnaamijka wuxuu halis ugu jiraa in uu dhicisoobo.

Haddii barnaamijku uu ka baxo wadadii saxda ahayd, markaas horumarka DFS ee ku aaddan xaqiijinta deyn cafinta dibadda waxa dib loo dhigi doonaa ugu yaraan laba sano. Hirgelin lagu qanco oo ah bar-naamijka Taageerada Deyn Cafinta oo soconaya mudo saddexda sano ah ayaa ah shuruudda Dhameystirka ee looga baahan yahay deyn cafinta Waddan Faqiir ah (Sanduuqa 2).

Sidaa darteed Wasaaradda Maaliyadda waxay ku qasbanaatay inay hesho ilo kale oo maaliyadeed si ay u kabto hoos u dhaca taageerada miisaaniyada laga soo bilaabo bilowga 2021, si ay awood ugu hesho inay sii wado ku bixinta mushaaraadka iyo raashiinka laamaha amniga waqtigooda iyo inay ka fogaato in ay ku aruuraan deymo, si uu barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka u noqdo mid guulaysta. Waxa laga rabaa in ay sidaa sii samayso, iyada oo aanan qaadan amaah dibadeed, kuna dadaalayso kharash dhimis, marka loo eego baaxada musharka ee kharashaadka guud.

Hoos u dhaca guud ee DFS ee 2021 wuxuu ahaa \$96 milyan, sidoo kale 3 dii bilood ee ugu horreysay 2022-kiina wuxuu ahaa \$15.9 milyan (jaantuska 2). Wasaaradda Maaliyadda waxay sii waday bixinta mushaaraadka iyo qarashaadka qandaraasyada kale inta lagu guda jiray 2021 iyo dhowrkii bilood ee ugu horreeyay 2022, iyada oo qaadaysay talaabooyin muddo gaaban ah oo is xigxigay.

¹³ 90 maalmood gudahooda laga bilaabo wakhtiga ay howsha ku egtahay

SANDUUQ 2 Hirgelinta barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka iyo ku guuleysiga deyn cafinta

DFS waa in ay xaqiijisaa tiro dib-u-habayn sababi karta inay ugu qalanto dhamaystirka barnaamijka Deyn Cafinta. Sababayaashaasi waxaa ka mid ah: "Joogtaynta xasiloona dhaqaalaha guud, oo lagu xaqiijinayo hirgelinta barnaamijka deyn cafinta ee ECF oo lagu qanco.*"

Si guud, DFS waxa ay sameyneysaa horumar wanaagsan oo ku aadan samaynta waxyaabo sababaya deyn cafinta iyo gaaritaanka dhamaystirka qaybta hore ee 2023 taa oo u muuqata in la gaari karo. Si kastaba ha ahaatee, fursada sababi karta xasiloona dhaqaalaha guud way lumi kartaa haddii DFS ay buuxin weyso shuruudaha barnaamijka deyn cafinta (sida ku bixinta mushaaraadka iyo waajibaadyada heshiyada waqtigooda) ama haddii barnaamijku si toos ah uu waqtigiisa dhaco (tusaale, hadii dib u eegista barnaamijka aan lagu sameynin mudadii ay Heyadda Lacagta Aduunka u cayintay).

Sida uu qabo xeerka Heyadda Lacagta Aduunka, waxqabadka barnaamijka deyn cafinta waa in dib loogu eegis lagu sameeyaa siddeed iyo tobankii biloodba mar. Dib-u-eegistii barnaamijka deyn cafinta ee ugu dambaysay oo ay samaysay DFS waxa la dhameeyey 18-kii Noofembar 2020. Sidaa darteed, waxaa loo baahan yahay in Heyadda Lacagta Aduunka ay ansixiso dib-u-eegista lagu sameeyo barnaamij ugu dambeyn 17-ka Maajo 2022, si looga fogaado in barnaamijku la baabi'yo. Xiliga kala guurka dartiisa, DFS waa ay awoodi weysay in dhamaystirto dib u eegista 17ka Maajo 2022. DFS waxay ka codsatay Guddiga Heyadda Lacagta Aduunka in ay u oggolaadaan hal mar oo waqti kordhin ah oo 3 bilood ah, si loo sameeyo dib u eegis (ilaa iyo 17ka Agoosto 2022). Guddiga Heyadda Lacagta Aduunka waxaa laga yabaa inuu waqti kordhinta ogolaado hal mar oo kordhinta ah marka la gaaro isfahamka u dhexeeya maamulada iyo Heyadda oo sa-laysan bartilmaameedyada iyo tallaabooyinka kuwaa oo dib loogu soo celinaayo barnaamijka deyn cafinta qaabkii loogu talagalay muddada qabanqaabada. Waqti kordhinta waxaa la ogolaaday 9 ka Maajo 2022.

Haddii barnaamijka deyn cafinta ee hadda socda uu sidii loogu tala galay ugu dhaqan gali waayo ama uu waqtigiisa la dhafo, barnaamijka dhamaystirka deyn cafiska wuxuu u baahan doonaa inuu sugo ilaa laga hirgeliyo barnaamij lagu qanco oo ay taageerayso Heyadda Lacagta Aduunka. Tani waxay qaadanaysaa wakhti in laga gorgortamo lana ansixiyo. DFS waxa ay sidoo kale u baahan doontaa in ay muujiso rikoor adag oo lagu fulinayo barnaamij cusub. Dib-u-dhacyadani waxay u dib u dhigi karaan barta dhamaystirka deyn cafiska ilaa 2024-25. Tani waxay dib u dhigi kartaa gelitaanka dib-u-cusboonaysiinta ee ay DFS ku galayso maaliyadda caalamiga ah.

* Liiska oo dhamaystiran ee sababayaasha waxaa lagu dejiyay Soomaaliya: Dib u eegista Labaad ee hoos imaada Barnaamijka ay Shaqaaluhu Kormeeraan iyo Codsiga Qabanqaabada Saddexda Sano ah ee hoosta-ga ECF - War-Saxaafadeedka: Warbixinta Shaqaalaha iyo War-Saxaafadeedka Fulinta ee Soomaaliya. (imf.org)

Markii hore, Wasaaradda Maaliyadda waxa ay maalgelisay hoos u dhaca billaha ah, iyada oo ka faa-iidaysanaysa taageerada miisaaniyadeed ee aan la isticmaalin laga soo bilaabo sanadii 2020 iyo iyada la baxday lacagihii hore loogu qoondeeyay koontada kaydka ku meel gaarka ah.


Wadar ahaan, dhaqaalaha labadan ilood laga bixiyay ayaa gaarey \$20 milyan, waxaana lagu taageeray kharashaadka ka baxay DFS ilaa bisha Juun 2021. Kadibna Wasaaradda Maaliyadda waxay amaah ku meel gaar ah ka qaadatay Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, taasoo gaareysay \$22 milyan, sida uu

oggol yahay Xeerka Bangiga. Xeerka Bangiga waxa uu awood u siinayaa Bankiga in horumaris lacageed oo tooas u siiyo DFS, iyada oo ujeedadu tahay in la dhimo isbedbedelka u dhexeeya dakhliga miisaaniyada ee soo xarooda iyo lacagaha ka baxa dawladda¹⁴.

DFS waxa looga baahan yahay inay bixiso dulsaar lacag kasta o ay deynsato sida waafaqsan dulsaarka suuqa ah ee uu go'aamiyay Bankiga Dhexe. Wadarta xaddiga amaahda ah ee taagan wakhti kasta kama badnaan karto boqolkiiba shan iyo toban dakhliga guud ee DFS (marka laga reebo deeqaha) sanadkii hore.

¹⁴ Qodobka 29aad ee Xeerka Bangiga Dhexe Soomaaliya.

Jaantus 2: Dakhliga iyo kharashyada billaha ah ee DFS, 2021 - 2022 (Doolar milyan)



Xigasho: Wasaaradda Maaliyadda


Lacagaha bangiga dhexe waxa ay u sahashay Wasaaradda Maaliyadda in ay sii wado dabooolida hoos u dhaca dhaqaale ilaa iyo Sebtembar 2021. Wixii intaa ka dambeeyey, Wasaaradda Maaliyadda waxay wajahday xaqiiqda ah in aysan awoodin in ay sii wado bixinta mushaaraadka si buuxda. Qoondaynta caalamiga ah ee Heyadda Lacagta Aduunka ee loo yaqaanno SDR (SDR waa hanti kayd caalami ah, oo ay samaysay IMF 1969 si ay u kabto kaydka rasmiga ah ee wadamada xubnaha ka ah) ee bishii Agoosto 2021 ayaa taakulaysay Wasaaradda. Qoondaynta SDR ee ku soo hagaagtay Soomaaliya ayaa gaaraysay \$223 milyan. Qayb ka mid ah dhaqaalaha ayaa loo isticmaalay in ay Wasaaradda ku bixiso amaahdii laga soo qaaday bangiga dhexe, iyo in lagu bixiyo khidmadaha dulsarka ah ee deymaha Bankiga Adduunka.

Lacagaha soo haray, oo gaarayey \$180 milyan, ayaa waxa si siman u qeybsaday Wasaaradda iyo Bangiga dhexe, iyadoo taa ay ku caawisay Wasaaradda Maaliyadda dhaqaale ku filan oo ay ku dabooshay hoos udhaca billaha ah ee ilaa 6da bilood hore ee 2022.

Cadaadiska miisaaniyadeed ee DFS ayaa sababay in qarashaadka ka baxsan mushaarkaadka la siiyo hay'adaha DFS aad loo xaddiday sidoo kale lacagtii ay DFS siin jirtay dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS ayaa sidoo kale aad loo dhimay (Jaantus 3). Sanadii 2020 ki DFS waxa ay ku wareejisay dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS iyo Maamulka Gobolka Banaadir lacag dhan \$78 milyan, taa oo u dhiganta boqolkiiba lix iyo toban kharashaadka DFS.

Wadar ah \$75 milyan oo ka mid ah lacagataas dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS iyo Gobolka Banaadir waxay u isticmaaleen bixinta mushaaraadka iyo kharashaadka hawlaha kale. Seddexda milyan oo doolar ee soo hearty ayaa loo qoondeeyay mashaariicda deeq-bixiyayaashu ay maalgeliyaan. Sanadii 2021, lacagtii ay DFS siin jirtay dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS waxay hoos ugu dhacday \$44 milyan, oo u dhiganta boqolkiiba sagaal ee wadarta kharashaadka DFS. \$34 milyan oo ka mid ah \$44 ka milyan waxa loo isticmaalay bixinta mushaaraadka iyo kharashaadka shaqada halka \$10

Jaantus 3: Lacaga ay DFS ku wareejisay Dowlad Goboleedyada iyo Gobolka Banaadir 2018 - 2021 (Doolar milyan)



Xigadisho: Wasaaradda Maaliyadda

milyan ee soo haray loo qoondeeyay mashaariicda ay deeq-bixiyayaashu maalgeliyaan.

Hoos u dhaca ku yimid bixinta mushaaraadka iyo kharashaadka shaqada waxa si weyn ay u saameeyeen dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS, iyadoo DFS ay sii waday inay qayb ka mid ah dakhliga furdada la wadaagto Gobolka Banaadir.

Cadaadiska ku yimid maalgelinta hay'adaha DFS iyo lacagii ay heli jireen ay dowlad goboleedyada xub-naha ka ah DFS way sii socon doontaa inta ka harsan 2022. Waxa sidoo kale jirta khatar ah in DFS ay hesho kharash aan ku filneyn oo aan dabooli karin mushaaraadka sanadka oo dhan. Wasaaradda Maaliyadda waxa ay diyaarin kartaa amaah kale oo ku meel gaar ah oo ay ka qaadata bangiga dhexe, laakiin wali taa ku ma filna in ay buuxiso hoos u dhaca miisaaniyada ilaa dhamaadka sanadka haddii aanan dib loo bilaabin taageerada miisaaniyada ee deeq bixiyeyaasha.

Waxaa laga maarmaan ahaan doono in maamulka cusub ee DFS uu isfaham la gaaro deeq bixiyayaasha bixiya taageerada miisaaniyadeed, si ay awood ugu yeeshaan dib u soo celinta taageerada miisaaniyada. Udub-dhexaadka isfahamkaas wuxuu noqon doonaa ballan-qaad cusub oo ay DFS ku sameyso dib-u-habaynta maamulka maaliyadda iyo barnaamijka ECF ee Heyadda Lacagta Aduunka oo lagu saleeyay bixinta taageerada miisaaniyadda. Haddii aysan DFS heshiisyo noocan oo kale ah la gaarin saaxiibadeeda beesha caalamka, maamulka cusub ma awoodi doono inuu bixiyo mushaaraadka waqtigii loogu talagalay ama gabi ahaanba dhowr bilood gudahood.

Dib-u-Dhaca Dib u Habeynta



Qaar ka mid ah howlaha barnaamijka dib u habeynta dhaqaalaha DFS ayaa hergelintooda socotay ayadoo ay jirtay hubaal la'aanta siyaasadeed oo ay sababtay dib u dhacyada doorashada daba dheeraatay.

Waxaa xusid mudan:

- Xafiiska Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka wuxuu soo gabagabeeyey xisaab-xirka DFS 2020, ee-gista hufnaanta 24 hay'addood oo DFS ah¹⁵, iyo xisaab xir gaar ah oo ku saabsan kalluumeysiga iyo isticmaalka lacagaha Covid-19. Warbixinadaan waxaa loo gudbiyay Baarlamaanka, waxaana khadka online-ka la soo dhigay bishii Nofembar 2021¹⁶. DFS waxay hadda buuxisay shuruudihii HIPC ee dhameystirka, ee ahayd inay u daabacdo ugu yaraan laba sano oo xiriir ah oo ah xisaab xir maaliyadeed.
- Bangiga dhexe waxa uu sii waday in uu horumar xooggan ku samayso dib-u-habaynta waaxda maaliyadda. Saddex shirkadood oo bixiya lacagaha la iskugu diro mobilada ayaa shati la siiyay tan iyo bilawgii sanadka 2021. Dhammaan saddex iyo tobanka bangi ganacsi oo shatiga haysta ayaa hadda ku xiran nidaamka lacag bixinta qaranka, taas oo u sahlaya in ay midba midka ka-le kula macaamilo qaab elektaroonik ah. Waxaa socda shaqada lagu daah-furayo isdhaafsigiisa lacag-bixinta Soomaaliya inta lagu jiro 2022, kaas oo sii fududayn doona waxtarka nidaamka bangiyada iyadoo loo maraayo qaabka ATM-ka, kaadhadhka iyo bangiyada wax kala iibsiga qaab online ah. Bangiga dhexe waxuu joogteeyay soo saaridda warbixnada dhaqaalaha ee sanadlaha ah kuwa seddex bille ah¹⁷. Bangiga dhexe wuxuu soo gabagabeeyay xisaab xirkiisa 2020 waxuu-na helay xisaab xir nadiif ah markii ugu horeysay.
- Wasaaradda Maaliyadda waxay sii wadey dib u habaynta furdooyinka. Waxa ay samaysay Nidaamka Casriyenta Furdooyinka kaas oo awood u siinaya habka elektarooniga ah iyo iswaafajin dukumentiyada wax soo dejinta iyo xisaabinta cashuuraha ku waajibay badeeco iyada oo la isticmaalayo ad valorem tarif (waa khidmad lagu soo rogo soo dejinta badeecada, oo lagu qeexo boqolleyda go'an ee qiimaha). Tijaabinta nidaamkan ayaa ka bilaabatay Dekedda iyo Garoonka Muqdisho bishii Febraayo 2022, taasoo hordhac u ah in si buuxda loo hirgeliyo ru-buc labaadka sanadkan. Tijaabinta ayaa la filayaa

¹⁵ Xisaabinta u hoggaansanaanta ayaa sidoo kale daboolay maamulka gobolka Banaadir iyo saddex xafiis diblomaasiya-deed oo ka tirsan DFS.

¹⁶ Eeg <http://oag.gov.so/audit-reports/>

¹⁷

inay ka bilaabato Puntland iyo Jubaland inta lagu guda jiro rubuca labaad ee 2022, iyadoo sidoo kalena la hergelin doono horraanta 2023, iyadoo ay taageerayo horumarka laga gaaray heerka dhamaystirka HIPC ee ah : "In la qaato, lana isticmaalo hal cashuur oo mideysan oo laga qaado dekedaha oo dhan

- Wasaaradda Maaliyadda waxa ay sidoo kale ka shaqaynaysaa abaabulka sidii kor loogu qaadi lahaa dakhliga isgaarsiinta. Waxaa ay la shaqaynaysaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka si ay u diyaariso jadwal khidmadda isticmaalka hirarka (spectrum fee) ee laga qaadayo shirkadaha isgaarsiinta, si ururinta khidmadaha ay u bilaabato horraanta 2023-ka.

Dib u habayno kale oo muhiim aha ayaa la hakiyay, Gaar ahaan:

- Wada tashiyadii dib-u-eegista ee Dastuurka ayaa istaagay. Bishii Janaayo 2020, Guddiga Korjoogteynta ee Baarlamaanka ayaa ansixiyay nuqul qabyo ah oo ka mid ah Dastuurka Federaalka ee dib loo eegay oo ay soo diyaariyeen Guddiga Madaxabanaan ee Dib u Eegista Dastuurka. Dastuurka qabyo-qoraalka ah ayaa soo jeediyay in dib u eegis lagu sameeyo cutubka maal-iyadda, si loo waafajiyo sharciga aasaasiga ah. Waxa uu sidoo kale uu Dastuurka qabyo-qoraalka ah soo jeediyay in la dhiso Guddiga Dakhli Wadaagista oo mas'uul ka ah soo jeedinta talooyinka ku saabsan wax wadaqeybsiga u dhaxeeya DFS iyo dowlad

goboleedyada xubnaha ka ah DFS, oo uu ku jiro dakhliga ka soo xarooda kheyraadka dabiiciga ah. Wadatashiyada ku saabsan dastuurka waxay ka bilowdeen dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS bishii Maarso 2020 laakiin wax horumar ah ma samayn ilaa hadda.

- Baarlamaanka ayaanan ansixinin sharciyo muhiim ah oo dhanka maamulka maaliyadda ah. In ka badan labaatan hindise sharciyeedyo ayaa lagu soo celiyay Golaha Wasiirada ka dib markii uu dhamaaday muddo xileedka Baarlamaanka (Lifaaqa 3). Waxa ku jira Hindise-sharciyeedka lagu canshuuray shirkadaha wax-qodista, kaas oo dhaqan gelintiisa ay tahay mid ka mid shuruud-daha Dhamaystirka deyn cafinta HIPC, iyo Xeerka beegsiga Cunaqabataynta Maaliyadeed, kaas oo dhaqan gelintiisa ay tahay bartilmaameedka barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka.

Dib u dhacyada doorashada ayaa tijaabo u noqotay awooda sharciyada maamulka maaliyadda ee jira, si loola tacaalo xilliga kala guurka ee daba dheeraaday. DFS ayaanan awood u yeelan in Miisaaniyadda 2022-ka ay horgeeyso Golaha Shacabka si ay u ansixiyaan ka hor inta uusan bilaaban sanad xisaabeedka 1-da Janaayo 2022, sababtoo ah waqtiga baarlamaanka ayaa ka dhacay. Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud waxa uu dhigayaa haddii Baarlamaanku ku guul-darraysto inuu ansixiyo Miisaaniyadda ka hor bilowga sannad-maaliyadeedka; DFS in ay sii isticmaasho kharashaadka miisaaniyadii la ansixiyey ee sannadkii hore muddo sagaashan cisho ah¹⁸.



¹⁸ Qodobka 22aad ee Xeerka PFM.

Muddadii sagaashanka cisho ahayd ayaa la dhaafay, balse sharciga Maamulka Maaliyadda Guud kuma jiro qodobbo kharash-bixineed ka dib dhammaadka mud-dada sagaashanka cisho ah. Si loo helo kharashaadka dawladda, Golaha Wasiirada ayaa bishii Maarso 2022 ansixiyay miisaaniyad ah rubuc labaad ee sanadka oo u dhiganta miisaaniyada rubuci kobaad. Madaxweynaha ayaa digreeto ku ansixiyay miisaaniyadda si ay u suurtagasho in kharashaadku sii socdo Abriil ilaa Juun 2022.

Dib u dhaca doorashada ayaa sidoo kale iftiimiyay dhawr arinood oo la xiriira xeerarka xiliga ka guurka oo aad ugu baahnaan lahaa bidhaamin. Kuwaas waxaa ka mid ah xaaladaha maamulka waqtigiisu dha-maanayo uu ku geli karo heshiisyo cusub ama uu ku magacaabi karo shaqaale cusub.

Dib u dhacyada doorashada ayaa sidoo kale geliyey halis hirgelinta barnaamijka ka dhexeeyey DFS iyo Heyadda Lacagta Aduunka sida lagu sharaxay sanduuqa 2. Heyadda lacagta Aduunka waa ay dhamey-stiri kari weysay dib ueegista barnaamijka xiliga loo qabtay ee 17 ka Maajo 2022, sababtoo ah ballan-qaadyada barnaamijka sanadka soo socda waa in ay ansixiyaan maamulka cusub kaas oo qaadaya masuuliyada fulinta balanqaadyadaas. Guddiga Heyadda Lacagta Aduunka ay ansixiyay muddo kordhin hal mar oo saddex bilood ah, taa oo uu macneheedu yahay in barnaamijka la baabi'in doono hadii aan dib u eegistu la dhamaystirin 17 ka Agoosto 2022. Arrintaas waxa ay dib u dhigaysaa heshiiska taageer-ada miisaaniyada, kaas oo inta badan deeq-bixiyayaasha ay yihiin kuwa ku xiran barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka, taas oo sii xumaynaysa cadaadiska miisaaniyadeed ee hadda jira. Waxa kale oo ay si weyn u daahin doontaa wakhtiga lagu gaadhayo deyn cafiska (muhiimna u ah maalgashiga dibadda ka imaanaya) maadaama hirgelin lagu qanco barnaamijka oo saddexda sano ah ay tahay shuruud ka mid ah dhammaystirka deyn cafinta.

Hababka liita ee qandaraas bixinta



Hordhac

GMM waxuu siinaysay DFS talooyin ku saabsan hababka qandaraas bixinta ilaa horraantii 2014. Talooiyinka GMM waxay ka kooban tahay wax iibsiga guud ee qiimaha sarreeya (oo ay DFS ka soo iibsato shirkadaha gaar loo leeyahay alaab, shaqo, iyo adeegyo) iyo dhammaan heshiisyada qandaraasyada (oo ay DFS qandaraas ku siiso shirkad ganacsi oo gaar loo leeyahay si ay u maareeyso hantida ama adeegga dowladda si ay qeyb uga hesho qiimaha)¹⁹.

Hababka qandaraaska ee ay bixiso DFS ayaa taariikh ahaan lahaa cillado waaweyn. Ilaa 2016 qandaraasyada waxaa loo bixin jiray si isku mid ah, iyada oo aan wax tartan ah dhicin, badanaa ka dib markii shirkad ay la soo xiriirto hay'ad DFS ah si ay ugh soo bandhigto soo jeedin aan la codsan. Dukumeentiyada qandaraasku guud ahaan waxa ka maqnaa tilmaamo cad, heerar hawl qabad oo ku filan, iyo qodobbada muhiimka ah sida qodobbada lagu joojin karo qandaraaska. Natiijada ka dhalatay arrintaas waxay ahayd qiimo liita oo ay DFS lacagteeda ku badalto, dhaqangelinta qandaraaska oo xaddidanta iyo muran ka yimaada qandaraasyada. Hufnaan la'aanta bixinta qandaraasyada ayaa sidoo kale sii muujiyey eedeymaha musuqmaasuqa²⁰.

¹⁹ Qodobka 108aad ee Xeerka wax soo libka waxa uu ku qeexay in heshiiska ay tahay in dawlad ama wakaaladeedu ay siiso hay'ad gaar loo leeyahay, laguna wareejiyo hantida guud muddo cayiman oo hantidaas lagu wadi karo, lagu maamuli karo, lagana faa'iidayasan karo ama lagu horumarin karo. Iyada oo howshaas ay qabanayso Hay'adaha gaarka loo leeyahay taas oo bixinaysa khidmad ama royalties-ka iyada oo shuruud looga dhigayo in Dawladdu ay sii haysato danaheeda guud ee hantida iyo in hantidu dib ugu soo noqoto hay'adda Dawladda wakhti go'an.

²⁰ [somalia-overview-corruption-and-anticorruption.pdf](https://www.alnap.org/document/attachments/1000000000/1000000000.pdf) (alnap.org)

Ilaa intii laga soo gaarayey doorashada 2017, dhowr hay'adood oo DFS ka mid ah ayaa heshiisyo qandaraasyo ah iska bixiyey iyadoon loo marin habraac hufan. Qandaraaslayaashu waxa ay adeegyadii dawladda u dhiibeen qolo saddexaad si ay qayb uga helaan dakhliga ka soo baxa. GMM waxuu helay fursad ay dib u eegis ku sameeyso qandaraasyadan markii la bixiyey kadib. Maamulkii yimid ayaa qaaday tillaabo dib u eegis loogu sameeyay qandaraasyadaas oo qaar ka mid ah la joojiyey, inkastoo qaar kalena ay sii wateen shaqadooda²¹.

Laga soo bilaabo 2017, DFS waxa ay horumar ka samaysay hababka qandaraas-bixinta iyada oo inta badan ay Wasaaradda Maaliyadda kordhisay dhaqangelin shuruudaha Sharciga libka ee 2016 ee qus-eeayaa bixinta qandaraasyada dawladda oo ay ku jiraan soo iibsiga iyo qandaraasyada. Nidaamyo soo bandhigid iyo korjoogteyn kala duwan ayaa khuseeya labada hab-raac ee kore. Guulaha waaweyn waxaa ka mid ah qandaraasyada raashinka ee laamaha amniga oo tartan loo galay²² iyo dib u gorgor-tanka qandaraasyada maamulka dekedda iyo garoonka diyaaradaha²³.

Si kastaba ha ahaatee, hay'ado badan oo DFS ka tirsan ayaa leh awood xaddidan oo ay ku buuxin karaan shuruudaha Sharciga wax soo iibsiga. Waxay inta badan dhayalsadaan wakhtiga ay ku qaadanayso ho-rumarinta habraaca qandaraaska iyo in aysan lahayn awood ay ku horumariyaan qeexitaannada qandaraasyada. Waxa kale oo ay leeyihiin faham xaddidan oo ku saabsan hababka soo bandhigid iyo ansixinta heshiisyada qandaraaska, kuwaas oo hoos imaanaya Guddiga Wasiirada ee Qandaraasyada. Mararka qaar hay'adaha DFS waxay iska indha tiraan ku dabaqidada shuruudaha Sharciga libka ee bixinta qandaraasyada waxayna hareer maraan doorka Guddiga Wasiirada ee Heshiisyada

Isku dayo lagu bixiyo qandaraasyo iyada oo aan la raacin nidaam sharci ah inta lagu jiro xiliga kala-guurka

Xilliga kala-guurka doorashada oo daba-dheeraaday ayaa sare u qaaday khatarta ah inuu xumaado ha-

babka lagu bixiyo qandaraasyada. Si loo yareeyo khatarta ah in hay'adaha DFS aysan ku dhaqmin shuruudaha Sharciga libka si ay u bixiyaan qandaraasyo ka hor isbeddelka maamulka, ayaa 7-dii Agoosto 2021 Madaxweynaha uu soo saaray wareegto ka mamnuucaysa dhammaan hay'adaha DFS in ay heshi-isyo la saxiixaan shirkadaha caalamiga ah inta laga gudbayo doorashada²⁴. Wareegtadiisa ayaa la mid ahayd tii uu soo saaray Madaxweynihii isaga ka horreeyay ee Xasan Sheekh 1-dii September 2016-ka, kaasoo ka mamnuucay Hay'adaha DFS inay qandaraasyo cusub galaan xilliga doorashada.

Sidoo kale, Ra'iisul Wasaare Rooble ayaa faray dhammaan hay'adaha DFS inay gutaan waajibaadkooda caadiga ah ee ah xukumad xilgaarsiinayd, sida waafaqsan qodobka 103-aad ee dastuurka KMG ah²⁵. Qodobka 103aad waxa uu awood u siinayaa dawladda xil gaarsiinta ah in ay fuliso 'waajibaadka joogtada ah', laakiin ma qeexayo 'waajibaadka joogtada ah'.

Laga soo bilaabo Sebtembar 2021, GMM wuxuu ogaaday isku dayo dhowr ah oo ay sameeyeen hay'adaha DFS si ay u bixiyaan heshiisyo qandaraas loo tartamin, lana raacin shuruudaha sharciga iibka. Talooyin sharci uu Garyaqaanka Guud ee Qaranka ayaa u muuqday inay ogolaanayeen talaabooyinkaasi, inkastoo uusan xafiiskiisu awood u lahayn, sida uu dhigayo sharciga iibka. Qandaraasyada laga hadlayo waxaa ku yimid cilado. Tusaale ahaan:

- Wasaaradda Dekeduhu waxay soo jeedisay in la bixiyo qandaraas diiwaan-gelinta maraakiibta ('la ogolaado in ay qaataan calanka') iyo shahaado-siin ah oo aan loo marin habraacyada qandaraas-bixinta. Sidoo kale ay haysan sharci ku filan oo kaalmeeya, maadaama aysan DFS weli cusboonaysiin qaab-dhismeedka sharciga badda ee Soomaaliya.
- Wasaaradda Ganacsigu waxay isku dayday inay ku bixiso qandaraas adeega qiimaynta waxyaabaha la soo dhofiyo si xulitaan xiran ayadoo iska indho-tirtay dadaal dhowr bilood ah oo uu bixisay Hay'adda Tayo dhoorka Soomaaliya, si ay u diyaariso hindise tartan oo

²¹ Waxa meesha ka baxay heshiisyada cashuuraha waddooyinka, cashuurta kala wareejinta hantida, iyo ruqsadaha gaadiidka. Qandaraasyada bixinta fiisaha iyo adeegyada tagaasida gegida dayuuradaha ayaa wali shaqeynaya.

²² Qandaraasyo lagu tartamay ayaa la qabtay 2019 iyo 2021.

²³ Heshiiskii wax-ka-beddelka lagu sameeyay garoonka diyaaradaha waxa la saxiixay 2019-kii, heshiiska dekedda oo wax laga beddelayna waxa isna la saxiixay 2020, labada heshiisba waxa ay ka tarjumayaan hab-dhaqan wanaagsan oo caalami ah.

²⁴ Villa Somalia on Twitter: "H.E President @M_Farmaajo issues a Presidential decree barring all government institutions from signing any form of agreements involving our republic and other countries, institutions, and international companies until after the conclusion of elections. <https://t.co/Pm1p9WnPKY>" / Twitter

²⁵ Somalia: PM Roble Contradicts President Farmaajo as Rift Grows - allAfrica.com

waafaqsan shuruudaha Sharciga Iibka. Ogeysiiska qandaraas-bixinta ma lahayn wax qeexaya nooca adeeg ama shuruudaha qandaraaska.

Ka dib markii ay arrinta ay soo farageliyeen Wasaaradda Maaliyadda iyo Hanti-dhowrka Guud, qandaraasyadaasi midna lama saxiixin. Hay'adda Tayo dhoorka Soomaaliya waxay sii waday diyaarinta hannaankii tartanka qandaraasyada ee adeega qiimaynta waxyaabaha la soo dhoofiyo, kaasoo ay doonayso inay soo saarto marka maamulka cusub yimaado.

Heshiiska lagu muransan yahay ee todobada xirmo shidaal ee la bixiyay

Shati siinta shidaalka iyo gaaska ayaa ahaa heshiiska ugu dhibka ugu badan ee aan la saadaalin karin xiliga kala guurka. DFS waxay filan kartaa inay dakhli ka hesho wax-soo-saarka batroolka laba sifo oo waaweyn; Qidmad sanadle ah oo uu bixinaayo qandaraaslaha oo ah lahaanshaha, iyo in ay hesho qayb ka mid ah faa'iidada qandaraaslaha. Dhawrkii sano ee la soo dhaafay, Wasaaradda Batroolka iyo Mac-danta waxa ay samaynaysay heshiiska wax-soo-saar wadaaga si loogu isticmaalo shatiga soo saarista saliidda iyo gaaska.

Bishii Nofembar 2022, ka dib wadahadal dheer oo dhex maray Wasaaradda Batroolka iyo Wasaaradda Maaliyadda ee ku saabsan qaab xisaabeedka boqolkiiba faaiidada lahaanshaha, guddiga heer wasiir

ee qandaraasyada ayaa ugu dambeyntii ansixisay heshiiska wax-soo-saar wadaaga taa oo muujisay yada-diilo wanaagsan oo ah in Wasaaradda Batroolka ay isu diyaarinayo iney sameeyo shati ah soo saarista saliid iyo gaas oo waafaqsan shuruudaha sharciga Soomaaliya.

Heshiiska wax-soo-saar wadaaga ee ay soo saartay Wasaaraddu waxa uu noqday mid heer hoose ah oo faa'iidada lahaanshaha ay gaarayso boqolkiiba shan. Sidoo kalena aanan qaybsiga faa'iidadana lagu go-aaminin. Taa baddalkeeda, qandaraaslayaasha ayaa laga doonayaa inay soo gudbiyaan saami qaybsiga faa'iidada ay soo jeedinayaan, taasoo qayb ka noqonaysa dalabkooda mar kasto oo shati la bixinaayo. Kororka faaiidada ay helayso DFS wuxuu ku xiran yahay in ay bataan tartannada shati bixinta wax soo saarka. Marka la eego heerka hoose ee faaiidada lahaanshaha ee lagu qeexay heshiiska wax soos aar wadaaga, saami qaybsi faa'iidado oo wanaagsan waa lama huraan si loo hubiyo in DFS ay ka hesho faa'diiso ka soo laabataa soo-saarka batroolka.

Bishii Febraayo 2022, Wasiirka Batroolka ayaa si lama filaan ah ugu dhawaaqay in heshiis dhanka wax soo saarka shidaalka oo ah 7 xirmood ay la galeen shirkadda Costline Exploration. Heshiiskaas ayaa dhacay ka hor inta aysan Wasaaraddu bilaabin bixinta shatiga soo saarista saliidda iyo gaaska. Wasaaradda Batroolka ma bixin wax faahfaahin ah oo ku saabsan arrintaan.



GMM waxuu hore ugu taliyay in wada xaajood tooska ah la sameeyo ka dib marka uu bilawdo bixinta shatiga soo saarista saliidda iyo gaaska taa oo looga golleeyahay in wada xaajoodka tooska ah galo iyadoo la kaashanaayo macluumaadka shatiga, si loo helo gorgortanka saamiga oo faa'iido leh.

Dan ugu ma jirto DFS in ay ogolaato heshiisyo saami qaybsiga faa'iidada ka hor inta aysan si cad u fahmin qiimaha suuqa ee jira; waxaa jiri khatar ah in saamiyada faa'iidada lagu heshiiyey ay si aan loo baahnayn ugu roonaadaan qandaraaslaha. GMM ma uusan arkin nuqul ka mid ah heshiiska ay Wasaaradda Batroolka la gashay Coastline. Sidaa darteed Guddiga ma uusan awoodin inuu qiimeyn ku sameeyo hadii uu yahay mid ilaalinaya danaha DFS oo ku salaysan tartan furan.

Sharciga Batroolka ayaa siinaya Wasiirka Batroolka awood uu ku saxiixo heshiiska wax-soo-saar wadaaga²⁶. Si kastaba ha ahaatee, waa in dhammaan sharciyada kale ee lagu dabaqi karo marka la saamaynayo hindiso-bixinta, gorgortanka, iyo wax soo saar wadaaga. Wasaaradda kama aysan codsan ogolaanshaha Guddiga heer wasiir ee qandaraasyada si ay wada xaajood toos ah ula gasho Coastline, sida uu dhigayo sharciga wax soo iibsiga, sidoo kale lama wadaagin warbixinta qiimaynta ee ku talinaysa qaybsiga wax soo saarka kasta Guddiga ka dib gorgortanka qandaraaska.²⁷ Taa beddelkeeda, Wasaaraddu waxay ku tiirsanayd oo keliya qodobbada sharciga batroolka si ay u bixiso qandaraaska, in kasta oo qaybta heshiisyada ee Xeerka wax soo iibsiga ay si cad u khusayso heshiisyada saliidda iyo gaas-ka.²⁸

GMM waxuu hore u howl geliyay la-talin sharci oo madax-banaan taasoo go'aamisay in Xeerka Batroolka iyo Xeerka Iibka ay tahay in si wadajir ah loo akhriyo si loo maamulo qandaraasyada qaybsiga wax soo saarka Soomaaliya²⁹.

Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha ayaa si deg deg ah u diiday qandaraaska la siiyey Coastline, iyadoo loo cuskaday in aan la fasaxin, isla markaana aan loo marin habkii sharciga ahaa ee looga baahnaa.^{30,31} Madaxweynaha ayaa xusay in qandaraasku uu ka hor imaanayo wareegto uu soo saaray 7-dii Agoosto 2021. Kadib codsi ka yimid Ra'iisul Wasaaraha ayuu Hanti dhowrka guud ee Qaranka dib u eegis deg deg ah ku sameeyay, wuxuuna ku soo gabagabeeyay in saxiixa qandaraaskaas uu baal maray sharciyo iyo xeerar kala duwan. Kuwaas waxaa ka mid ah Xeerka Ra'iisul Wasaaraha ee uu lambarkiisu yahay 047/2018, Xeerka soo iibsiga iyo Sharciga Batroolka³². Wareegtada Ra'iisul Wasaaraha ayaa qeexaysa habraaca loo marayo ansixinta Golaha Wasiirada dhammaan heshiisyada lala galo shirkadaha caalamiga ah, iyadoo labada xeer ee wax soo iibsiga iyo sharciga batroolka ay dejinayaan habab gaar ah oo loogu talagalay gorgortanka tooska ah ee qaysiga wax soo saarka. Hanti dhowrka guud ee Qaranka ayaa hadalkiisa ku soo gabagabeeyay in aan midna la raacin.

Wasaaradda Arrimaha Dibadda ayaa intaa ka dib ogeysiis rasmi ah u dirtay Coastline in DFS ay u aragto heshiiskaas mid aan waxba ka jirin. Balse Coastline ayaa sheegtay in ay aaminsan tahay in heshiiska uu ansax yahay.

²⁶ Xeerka Batroolka: Qodobka 24.1

²⁷ IMCC waxay ansixisay heshiiska was soo saar wadaaga oo la raaci karo si loogu isticmaalo shati bixin tartanka bisha Noo-fambar 2021. Balse, ansixintaasi kama dhigna oggolaansha gaar ah oo ah in loo isticmaalo saldhigga gorgortanka lala yeelanayo shirkado gaar ah.

²⁸ Xeerka Iibka, Qodobka 110.1 (b) (viii)

²⁹ Qoraallada la talen ah ee guddiga FGC 2021/003

³⁰ Villa Somalia on Twitter: "The Presidency FGS hereby declares nullification of Petroleum pact signed by the Minister on behalf of FGS. The deal contravenes Presidential Decree 7/8/2021 which bans the inking of deals during elections so as to protect public resources from exploitation during the elections. <https://t.co/ATcFqUCw6g>" / Twitter

³¹ Mohamed Hussein Roble on Twitter: "The alleged production sharing agreement purportedly signed by the Minister of Petroleum with a foreign entity regarding Somali oil reserves is illegal, unacceptable since it wasn't done through legal avenues. I will take all appropriate measures to protect our national resources" / Twitter

³² SAI Somalia on Twitter: "Lifaaqa hoose ka dheeho war-saxaafadeed uu Xafiiska Hantidhawrka Guud ee Qaranka kasoo saaray heshiiska sharci darrada ah ee Wasaaradda Batroolka ay la gashay shirkadda Coastline Exploration Ltd, isaga oo gal-dacwadeed arrinkan ku aaddan u gudbiyay Xafiiska Xeer-llaalinta Guud. <https://t.co/eZDU3Ypo8a>" / Twitter



3. HORTABINADA MAAMULKA CUSUB

Maamulka cusub waxa uu la kulmi doonaa caqabado badan oo dhanka maamulka maaliyadda ah, kuwaas oo intooda badan ay uga sii dartay xilliga kala guurka ee daba dheeraaday. Xukuumadda cusub waxay u baahan doontaa inay si degdeg ah wax uga qabato caqabadahan si ay uga fogaato inay wax u dhimaan bilowga xilligeeda. Laba arrimood ayaa u baahan doona fiiri gaar ah:

- Sii wadida dib-u-habaynta dhaqaalaha iyo maaliyadda
- Ballanqaad nidaam cadaaladeed soo iibsiga iyo qandaraasyada ah

Sii wadida dib-u-habaynta dhaqaalaha iyo maaliyadda

Barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka la'aantiis suurtagal ma ah in DFS ay hesho

taageero miisaaniya-deed oo ku filan si loo soo afjaro farqiga maaliyadeed iyo mushaar bixin waqtigeeda ah. Sidaa darteed maamulka imaan doona wuxuu u baahan yahay inuu si degdeg ah heshiis qodobbada barnaamijka sii socda ee deyn cafinta uu la gaaro Heyada Lacagta Aduunka, iyo inuu ballan-qaado inuu horumar dheeraad ah ka sameeyo dib-u-habaynta dhaqaalaha iyo maaliyadda oo ay bilawday dawladii hore³³. Waxqabadka aan kala go'a lahayn oo ah barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka iyo qaab maaliyadeed oo lagu kalsoonaan karo ayaa ah shuruudaha bixinta taageerada miisaaniyada ee deeq-bixiyeyaasha waaweyn.

Ballanqaadka barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka maaha hawl hal mar un ah. Maamulka cusubi waa inuu ballanqaado qaab-dhismeed maaliyadeedkii oo lagu heshiiyey, in uu

³³ Oo ay ku jiraan dib-u-habaynta lagu tilmaamay xilligii doodi farsamo ee dib u eegistii labaad iyo saddexaad ee barnaamijka ay taageerayso IMF, oo la bilaabay Febraayo-Maarso 2022).

xaqiijiyo xadka ugu hoo-seeya ee la aqbali karo ee hantida bangiga dhexe ee taala dibedda, in uu xaqiijiyo meesha ugu saraysa kharashka ku baxa mushaaraadka, badeecadaha iyo adeegyada, iyo baahida dhaqaale ee lama filaanka ah, in uusan gelin wax deyn cusub ah, kana hortago aruurka dayn cusub oo gudaha ah. Bartilmaameedyada dakhliga gudaha iyo dheelitirka maaliyadeed sidoo kale waa in la buuxiyaa.

Haddaba maamulka cusubi waxa uu u baahan doonaa in uu xooga saaro abaabulka dakhliga iyo kala hormarinta dhinacyada kharashaadka. Waa in uu iska ilaaliyaa cadaadiska siyaasadeed oo ah debcinta dib-u-habaynta dakhliga ama inay ogolaato mudnaan kharashyo cusub. Waa in uu ka fogaato balaarin-ta mushaharka ee aan daruuriga ahayn. Xaddidaadda dhismaha hay'adaha dawladda ee cusub waxay noqon doontaa hab muhiim ah oo lagu xakameynayo kharashaadka dawladda.

Si loo xaqiijiyo in si guul leh loo hirgeliyo barnaamijka Heyadda Lacagta Aduunka, Madaxweynaha cusub iyo Ra'iisul Wasaaraha ayaa u baahan doona inay awood u yeelaan Wasiirka Maaliyadda. Wasaaradda Maaliyadda waxay kormeertaa ururinta dakhliga iyo fulinta miisaaniyada, iyadoo raacaysa sharciyada jira, waxayna maamushaa gaaritaanka halbeegyada barnaamijka Heyadda Lacagata Aduunka. Doorarka Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha wuxuu noqon doonaa inuu ku wargeliyo

xukuumadda inteeda kale ballan-qaadyada dib-u-habaynta iyo isku-dubbaridka waxqabadka xukuumadda.

Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Wasaaradda Maaliyadda iyo saaxiibada beesha caalamka ayaa looga baahan yahay in ay Baarlamaanka u sharxaan muhiimadda doorkiisa ku aaddan ansixinta sharciyada udub dhexaad u ah dib-u-habeynta maaliyadda. Soo gudbinta sharciga qabyada ah waa in mudnaanta la siiyaa iyadoo la raacayo muhiimada uu u leeyahay barnaamijka dib u habeynta. Wasaaradda Maaliyadda waa in ay dib u eegis ku sameyso dhammaan hindise sharciyeedyada saameyntooda maaliya-deed ka hor inta aan dib loo soo gudbin, si loo hubiyo in barnaamijka cusub ee sharci dejinta uu horsee-do koror aan sii waarin oo ah kharashaad maaliyadeed.

Ballanqaadka Nidaam Cadaaladeed ee libka iyo Qandaraasyada

Xubnaha Dowladda cusub waxaa laga yabaa inaysan la socon shuruudaha heshiis gelidda DFS ee ku dhi-gan Sharciga iibka Qaranka. Sidii horay loo arkay ba, waxaa laga yaabaa in Wasiirada cusub qaarkood ay rabaan inay baabi'iyaan qandaraasyo ay bixiyeen maamulkii hore, iyagoon qiil u haysan, halka qaar kale-na ay isku dayaan inay bixiyaan qandaraasyo aan buuxin shuruudaha sharciga iibka. Falalka caynkaas ah ayaa si degdeg ah u wiiqi kara sumcadda maamulka cusub, gudaha iyo dhanka beesha caalamkaba.



Waxaa muhiim ah in Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha cusub ay si cad oo degdeg ah uga go'an ta-hay hannaankii saxda ahaa ee bixinta qandaraasyada wax iibsiga qaran iyo heshiisyada qandaraas. Ra'iisul Wasaaraha waa inuu dhammaan Wasiirada iyo Hay'adaha DFS ku baraarujiyaa Shuruudaas. Wasaaradda Maaliyadda waa in ay soo saarto wareegto sharraxaysa habraacyada tartanka furan iyo kormeerka ee khuseeya wax iibsiga qaran iyo heshiisyada.

Maamulka cusub waa in uu sii wadaa hababka hadda jira ee ah in hay'adaha DFS ay la shaqeeyaan Waaxda Iibka ee Wasaaradda Maaliyadda marka ay sameynayaan wax soo iibsi qiimo sare leh iyo marka ay sameynayaan heshiisyo qandaraas. Qatarta la xirirta habka wax soo iibsigaa baahsan ayaa weli jirta, taa oo ay sabab u tahay diyaarinta tilmaamaha heshiiska oo hooseysa iyo fahan la'aanta shuruudaha sharciga iibka qaranka. Waa inay sidoo kale dowladdu muujisaa sida ay uga go'an tahay wax-soo-iibsi tartan furan ah iyadoo si degdeg ah u bilaabaysa hindise cusub oo loogu talagalay qandaraasyada raas-hinka iyo shidaalka ee laamaha amniga, kuwaas oo hakad lageliyey xilliga kala guurka.

Maamulka imaan doona wuxuu u baahan doonaa inuu fiiraa gaar ah u yeesho qandaraasyada shidaalka iyo gaaska. Maamulka wuxuu u baahan yahay in Wasaaradda Batroolka iyo Heyadda Batroolka

Soomaaliyeed ay:

- u diyaariyaan shati bixin hufan oo ah saliidda iyo gaaska oo lagu tartamo, kasoo buuxiya dhammaan shuruudaha sharci ee DFS.
- galaan wada xaajood toos ah oo ku saabsan heshiisyada saliidda iyo gaaska ka dib soo bandhigiida shatiyada, si wada-xaajoodka tooska ah uu u abaaro jaangooyooyta qiimo tartan ah iyo in kaliya xaaladaha wada xaajood toos ah la oggolaado sida uu dhigayo qaab-dhismeedka sharci ee DFS (oo uu ku jiro sharciga iibka).

Waxa kale oo ay dowladdu u baahan doontaa in ay ka shaqeyso sidii loo xalin lahaa khilaafaad kasta oo sharci ah oo ka dhasha baabi'inta toddobada xirmo ee lala galay shirkadda Coastline.

Ugu dambayntii, waa in ay sidoo kale dowladdu ku dadaashaa mustaqbalka in ay ka hortagto soo noqnoqosho dhibaatooyinkii laga la kulmay isbedelkii ugu dambeeyay ee xilligii kala guurka, iyada oo la samaynayo qeexitaan tafatiran oo ku saabsan 'waajibaadka caadiga ah' ee laga yaabo in ay qabsato dawladda xil-gaar-siinta, iyo sidoo kale xeerar cad oo ku saabsan qandaraasyada xilliyada ka horreeya waqtiga doorashada.



Lifaaq A: Horumarka oo la barbadhiagy hortabinada Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021

Hortabinada Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021	Hortabinada Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021
<p>Joogteynta xaaladda maaliyadda guud iyo xoojinta dib u habeynta maaliyadda</p> <ul style="list-style-type: none"> Xoojinta dakhli urururinta laamaha aadka muhiimka u ah ee lacagaha ka soo xarooda ay aad uga hooseeyaan sidii laga filayay siyaasad ahaan ama heerka gobolka. Laamahaasi waxaa ka mid ah isgaarsiinta, khidmadaha laga qaado diyaaradda hawada isticmaalo, iyo soo dejinta qaadka. In la sameeyo siyaasad ku saabsan dhisidda hay'ado dawladeed oo cusub oo madaxbaan iyo dib u eegista saamaynta miisaaniyadeed iyo awood u lahaanshaha sharci cusub. Horumar laga sameeyo sidii taageerada maaliyadeed ee dibadda ah ee la siiyo hay'adaha DFS loogu soo dari lahaa miisaaniyadda iyo daqliga, si waafaqsan sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud. Hirgelinta sharciyada jira, xeerarka, habraacayada dib u habaynta iyo in loo beddelo dhammaan intaas wax qabad Xoojinta shaqada siyaasadda Wasaaradda Maaliyadda, si loo hormariyo wax-tarkeeda ee arrimaha ka dhexeeya dhowr heyadood iyo mudnaanta istaraatiijiyadeed, oo ay ku jiraan isticmaalka nidaamyada dalka, dhisida heya-daha oo ku salaysan qiimeyn iyo dhammaystirka mashruuca deyn cafinta. Dhiirri-gelin horumarinta hab dastuuri ah iyo hab-wareejin ku salaysan qaaci-do daah-furan si loo hubiyo qaybsiga kheyraadka oo siman, si waafaqsan bix-inta adeegyada bulshada. Dhiirigelin in la ogolaado iyo xoojinta shaqada kormeerka madax-banaan ee Xafiiska Hanti Dhowrka Guud, si loo hormariyo isla xisaabtanka iyo hufnaan-ta maamulka ilaha dadweynaha. 	<p>Xafiiska Hanti Dhowrka Guud waxa uu sii waday in uu guuto shaqadiisa kormeerka, waxayna Wasaaradda Maaliyadda ay sii waday ka shaqaynta dib u habaynta dakhliga ee qaybaha mu-hiimka ah sida isgaarsiinta. Ma jiro wax horumar ah oo laga sameeyay samaynta hannaan dastuuri ah ama qaacido hufan oo kheyraad wadaag ah, ama qaadista tillaabooyin lagu xaddidayo abuurista hay'adaha. Waxaa hakad la galiyay talaabadii lagu gaarsiin lahaa hay'adaha DFS taageero maaliyadeed oo ay ka heli jireen hay'adaha Qaramada Midoobay ee ku jira miisaaniyada iyo kuwa ku jira khasnada dowladda inta laga ansixinayo Miisaaniyadda 2022-ka.</p>
<p>Daah-furnaanta iyo hufnaanta maamulka dakhliga kheyraadka dabiiciga ah</p> <ul style="list-style-type: none"> Hubin in qandaraasyada shidaalka iyo gaasku ay waafaqsan yihiin qaab-dhismeedka sharciga Soomaaliya iyo ballan-qaadyada loo sameeyey saaxi-badda beesha caalamka. La socodka qaybinta dakhliga shatiga kaluunka ee dowlad goboleedyada xubnaha ka ah DFS sida uu qabo heshiiska jira. 	<p>Horumar lagama samayn.</p>
<p>Maamulka bangiga dhexe iyo horumarinta waaxda maaliyadda</p> <ul style="list-style-type: none"> Sii socoshada dib-u-qaabaynta qorshaha Bangiga Dhexe. Sii socoshada nidaamka Bangiga Dhexe ee Lacag-bixinta Qaranka. Sii socoshada hormarinta uu Bangiga Dhexe wado ee ku aadan shati bixinta, nidaaminta shirkadaha bixiya adeegga lacagta mobaylada iyo hagaajinta xiriirka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ee shati-siinta. Horumarka joogtada ah ee Bangiga Dhexe ee wax ka qabashada caqabadaha qaab dhismeedka ku wajahan xawilaadda lacagaha, oo ay ku jiraan xiriirada bangiyada, iyo qaabka hawlgelinta iyo sharciga La-dagaalanka Lacag-dhaqidda iyo Ka-hortagga Maalgelinta Argagaxisada. Horumarka laga gaaray wajiga koowaad ee dib u habaynta lacagta oo ku sa-laysan 'mashruuca sarrifka lacagaha' si meesha looga saaro lacagaha been abuurka ah ee suuqa ku jira. 	<p>Saddex shirkadood oo bixiya lacagaha mobilada ayaa shati la siiyay tan iyo bilawgii sanadka 2021. 2021 ki Bangiga Dhexe waxaa uu heshiis is afgarad ah la saxiixday Heyadda Sigaarsi-inta Qaranka si loo xoojiyo wadashaqeynta nidaaminta shirkadaha bixiya adeegga lacagta teellafanada la isugu diro. Dhammaan saddex iyo tobanka bangi ganacsi ee shatiga haysta ayaa hadda ku xiran nidaamka lacag bixinta qaranka, taas oo u sahlaysa in ay midba midka kale ku macaamilo qaab elektronik ah. Waxaa socda shaqada lagu daah-furayo isdhaafsigga lacag-bixinta Soomaaliya inta lagu jiro 2022, kaas oo sii fududayn doona waxtarka nidaamka bangiyada, oo taageeraya mashiinada lacag kala bixidda, kaararka iyo bangiyada wax kala iibsiga qaab online ah.</p> <p>Bangiga dhexe wuxuu soo gabagabeeyay xisaab xirkiisa 2020 waxuuna helay xisaab xir nadiif ah markii ugu horeysay. Xisaab xira sanadka 2021 ee Bangiga dhexe waa la diyaariyay waxaa kormeer lagu sameyn doonaa rubaca labaad ee sanadka 2022.</p>
<p>Horumarinta istaraatiijiyadda maareynta deynta</p> <ul style="list-style-type: none"> Wasaaradda Maaliyadda si ay u horumariso istaraatiijiyad deynta si ay u maareyso khatartaha imaan kara ee ku gadaansan galka deynta iyo si loo yareeyo kharashka deynta. 	<p>Waxaa la filayaa inay howshaan bilaabato rubaca labaad ee sanadka 2022.</p>

³⁶ Hormuud Telecom waxa ay heshay ruqsad bishii Febraayo 2021, Somtel Juunyo 2021, iyo Somlink bishii Maarso 2022.

Hortabinada Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021	Hortabinada Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021
<p>U Hoggaansanaanta iyo qiimaha lacagta ee wax soo iibsiga qaran iyo Heshiisyada</p> <ul style="list-style-type: none"> • In la sii wado ka go'naashaha u hoggaansanaanta ee ku dhaqanka iyo hirgelin-ta qodobbada Sharciga iibka iyo xeerarka iibka ee dhammaan DFS. • In la kordhiyo wacyigelinta iyo fahamka guud ahaan ee hay'adaha DFS ee hannaanka hufan ee wax soo iibsiga qaran iyo qandaraasyada. • Joogteynta tartanka furan ee sanadlaha ah ee qandaraasyada raashinka shaqaalaha hay'adaha cadaaladda iyo amniga, oo ay ku jiraan Ciidanka Xoogga, Booliiska Soomaaliyeed, Asluubta iyo Nabad Sugidda. • Sameynta (hadba sidii loogu baahdo) iyo xoojinta awoodda hay'adaha kormeerka ee DFS iyo qaybaha farsamada ee la socda. • In lala socdo dhaqan galka heshiisyada dib looga wada xaajooday, si loo xaqii-jijo in dhinacyadi heshiiska galay ay u guteen waajibaadkooda, in DFS ay hes-ho faa'iidooyin maaliyadeed, iyo in aysan DFS ku xadgudbin waajibaadkeeda. • Ku dhiirigelinta horumarinta aqoonta farsamada iyo awoodda wargeysyada, raadiyaha, iyo telefishanada si kor loogu qaado hufnaanta iyo wacyiga dadweynaha ee qiimaha lacagta ee wax soo iibsiga qaran iyo qandaraasyada. 	<p>Wasaaradda Maaliyadda waxay ka hortagtay heshiisyo qandaraas oo aan waafa-qsanayn shuruudihii la rabay (qiimaynta tayada waxyaabaha la soo dhoofiyo, dii-waangelinta maraakiibta iyo shahaado bixinta). Way awoodi wayday inay sii wado dib-u-bixinta qandaraasyada Iraashiinka iyo shidaalka ee laamaha amniga sababo la xiriira xilliga kala guurka doorashada. Saad ku meel gaarka ah ayaa la sameeyay inta laga bilaabay tartan cusub marka maamulka cusub la dhiso. Mareeg Wax soo iib-siga ah ayaa la sameeyay si kor loogu qaado hufnaanta qandaraasyada DFS, waxaana la dhammeyn doonaa 2022.</p>

Lifaaq B: Qandaraasyada iyo Heshiisyada uu dib u eegay GMM ilaa 2014

#	Hay'adda DFS	Qandaraaska	Qandaraasaha	Nooca qandaraaska	Dib u eegista rasmi ah ee GMM	Xaalada imminka
1	Bangiga dhexe ee Soomaaliya	Kiraynta dhulka iyo dib u dhiska	Riverside Holding	Qandaraas	2016, 2018	Qandaraas waa la saxeexay balse lama fulin
2	Bangiga dhexe ee Soomaaliya	Dib u soo celin hanti	Shulman, Rogers, Gandal, Pordy & Ecker PA	Qandaraas	Dib looma eegin	La joojiyay
3	Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha	Xaqiijinta tayada soo dejinta/dhoofinta	Proje Gözetim Mühendislik (PGM Project)	Qandaraas	2015, 2016	Talooyinka GMM ayaa lagu daray; qandaraas waa la saxiixay laakiin lama dhaqan gelin.
4	Wasaaradda Difaaca	Raashinka Ciidanka Xoogga	AGETCO	Wax soo iibsi		Ka qaadashada raashinka hal shiirkad oo kaliya waa la joojiyay ka dib markii la soo jeediyay in qandaraasyada raashinka laamaha ammaanku looban yahay in si tartan furan ah loo bixiyo.
5	Wasaaradda Difaaca	Raashinka Ciidanka Xoogga	AGETCO	Wax soo iibsi	2017	Si tartan furan ah ayaa loo bixiyey; ka dibna waa la joojiyay
6	Wasaaradda Difaaca	Raashinka Ciidanka Xoogga	Kasram	Wax soo iibsi	2017	Qandaraaska si aan sharciga waafaqsanayn ayaa loo bixiyey; waana la baabi'iyey wax yar ka hor gabagabadiisa.
7	Wasaaradda Difaaca	Raashinka Ciidanka Xoogga – Lot 1	Scandinavian Trading	Wax soo iibsi	2019	Si tartan ah ayaa loo bixiyey; waana la soo gabagabeeyay
8	Wasaaradda Difaaca	Raashinka XDS – Lot 2	East Africa Trading	Wax soo iibsi	2019	Si tartan ah ayaa loo bixiyey; waana la soo gabagabeeyay
9	Wasaaradda Difaaca	Raashinka XDS – Lot 1	United Group of Companies	Wax soo iibsi	2021	Si tartan ah ayaa loo bixiyey; wuuna socdaa
10	Wasaaradda Difaaca	Raashinka XDS – Lot 2	Scandinavian Trading	Wax soo iibsi	2021	Si tartan ah ayaa loo bixiyey; wuuna socdaa
11	Wasaaradda Difaaca	U keenidda 6 doonyood oo ilaalada badda ah	AMO Shipping Company Ltd.	Wax soo iibsi	2014	Waa la saxiixay heshiiska; wuxuuna ku xiran yahay in dhinacyada xaliyan wixii tabasho ah
12	Wasaaradda Difaaca	Qalabaynta iyo tababarida Ilaalada Xeebaha	Atlantic Marine and Offshore Group	Wax soo iibsi	Dib looma eegin	Waa la saxiixay heshiiska; wuxuuna ku xiran yahay in dhinacyada xaliyan wixii tabasho ah
13	Wasaaradda Difaaca	Saad	SKA	Ma kala cada	2018	La ma garanayo xaaladdiisa; GMM waxuu ku taliyay baabi'intiisa
14	Wasaaradda Waxbarada	Buugaagta waxbarashada	Beder Printing House	Qandaraas	2018	Waa socdaa (wax ka beddel cusub ayaa la saxeexay Agoosto 2020); GMM waxuu ku taliyay in dib loo wadagorgortamo iyo/ama la joojiyo
15	Wasaaradda Waxbarada	Shahaadooyin	Security Printing Press	Qandaraas	2019	Qandaraaska waa la saxiixay; heerka uu marayo la ma garanayo; GMM waxuu ku taliyay in la baabi'yo
16	Wasaaradda Maaliyadda	Ururinta cashuurta diiwaangelinta hantida kala wareejinta	M&T Solutions Ltd	Qandaraas	2016	Waa La joojiyay
17	Wasaaradda Maaliyadda	Ururinta canshuurta waddooyinka	Smart General Service Ltd.	Qandaraas	2016	Waa La joojiyay
18	Wasaaradda Maaliyadda	Khat tax collection on behalf of FGS	The ADCO Group of Companies	Qandaraas	2015	Waa La joojiyay

#	Hay'adda DFS	Qandaraaska	Qandaraaslaha	Nooca qandaraaska	Dib u eegista rasmi ah ee GMM	Xaalada imminka
19	Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Kheyraadka Badda	Ilaalinta, shatiga, iyo horumarinta siyaasadda iyo horumarinta hay'adaha kalluumaysiga	Somalia-FishGuard Ltd.	Qandaraas	2014	Ma sii socon
20	Dowlad Goboleedka Galmudug	Heshiiska Wax soo saar wadaaga	Petro Quest Africa (CN)	Qandaraas	2014	Ma sii socon
21	Ciidanka Booliska Soomaaliyeed	Raashinka ciidamada booliiska	Perkins Logistics	Wax soo iibsi	2016	Talooyinka GMM ayaa qayb ahaan lagu daray; qandaraas hadda waa la soo gabagabeeyay
22	Ciidanka Booliska Soomaaliyeed	Raashinka ciidamada booliiska	Muna Transport	Wax soo iibsi	2019	Si tartan ah loo bixiyay; waana la soo gabagabeeyay
23	Ciidanka Booliska Soomaaliyeed	Raashinka ciidamada booliiska	Hanad Construction & General Trading	Wax soo iibsi	2021	Si tartan ah loo bixiyay; wuuna socdaa
24	Hogaanka Socdaalka	Fiisooyin	Empire Tech Solutions Ltd.	Qandaraas	2018	Waa uu socdaa; GMM waxay ku taliyay in la joojiyo ama dib loo eego
25	Hogaanka Socdaalka	Daabacaadda Baasaboorada	Ebtkaraat Smart System	Qandaraas	2018	Waa uu socdaa (laba sano oo dheeri ah ayaa la saxiixay 2021);
26	Hogaanka Socdaalka	Dukumeentiyada Qandaraaska Daabacaadda Baasaboorada		Qandaraas	2020	Tartanka waa la joojiyay, waxaa lagu taliyay nidaamka tartan cusub in la bilaabo
27	Nabad Sugidda	Raashiinka Hay'adda NISA	Horn Logistics	Wax soo iibsi	2016	Talooyinka GMM ayaa qayb ahaan lagu daray; qandaraas hadda waa la soo gabagabeeyay
28	Nabad Sugidda	Raashiinka Hay'adda NISA	Express logistics	Wax soo iibsi	2019	Si tartan leh ayaa loo bixiyay; waxay ahayd in la soo gabagabeeyo 2020, laakiin wali wuu socdaa
29	Wasaaradda Amniga Gudaha	Adeegyada iskaanka ee dekedda Muqdisho	M&T Solutions Ltd	Qandaraas	2016	Heshiiska waa la saxiixay laakiin lama hirgelin
30	Wasaaradda Cadaaladda	Raashinka xabsiyada	Bakhaari Logistics	Wax soo iibsi	2018	Faaloooyinka GMM wax laga ma qaban; qandaraaska hadda ayaa la soo gabagabeeyay
31	Wasaaradda Cadaaladda	Raashinka jeelasha/xabsiyada	Bakhaari Logistics	Wax soo iibsi	2021	Waa lagu tartamay bixintiisa; wuu socdaa
32	Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta	Habka shuruudaha ee sahaminta batroolka, horumarinta, iyo soosaarista	Model Oil and Gas Production Sharing Agreement	Qandaraas	2016, 2019, 2021	Waxaa ansixiyay Guddiga Wasiirada ee Qandaraasyada.
33	Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta	Faahfaahinta xogta sahaminta	Mubadala Oil and Gas Holding Company LLC (CN)	Qandaraas	2014	Heshiisku wuu dhacay
34	Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta	Sahamin	Soma Oil and Gas Exploration Limited	Qandaraas	2014	Qandaraaska ayaa la rumeysan yahay in la soo gabagabeeyay; lagu ma darin talooyinka GMM
35	Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta	Qiimeynta Geospatial	CGG Data Services AG/ Robertson GeoSpec International Ltd.	Qandaraas	2014, 2015, 2016	Wuu socdaa; waxaana lagu daray talooyinka GMM
36	Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta	Ururinta, falanqaynta, iyo suuq-geynta xogta batroolka	Spectrum ASA	Qandaraas	2015	Wuu socdaa; waxaana lagu daray talooyinka GMM
37	Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta	Ururinta, iyo suuq-geynta xogta juqraafiyeed	TGS-NOPEC Geophysical Company ASA	Heshiis	2014	Ma sii socon

#	Hay'adda DFS	Qandaraaska	Qandaraaslah	Nooca qandaraaska	Dib u eegista rasmi ah ee GMM	Xaalada imminka
38	Madaxtooyada	Raashinka	Regional Suppliers Company Ltd.	Wax soo iibsi	2018	Xaalkiisa la ma oga
39	Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda	Maamulka hawlaha dekedda	Albayrak Turizm İnşaat Ticaret A.Ş.	Qandaraas	2014; 2020	Wuu socdaa; heshiis dib ayaa looga gorgortamay, waxaana la saxiixay 2020
40	Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda	Horumarinta dekeddaha iyo kaabayaasha la xidhiidha	Great Horn Development Company	Qandaraas	2014	Ma sii socon
41	Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda	Ijaar iyo qandaraas ku saabsan ka shaqaynta terminalka kontaynarrada dekedda Muqdisho	Mogadishu Port Container Terminal and Simatech International	Qandaraas	2014	Ma sii socon
42	Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda	Maareynta iyo ka shaqaynta barxadda konteenarada iyo saldhiga xamuulka ee dekedda qallalan ee Muqdisho	Mogadishu International Port and Simatech International	Qandaraas	2016	Wuxuu u baahan yahay in la xaliyo ka dib gorgortankii qandaraaska maamulka dekedda ee Albayrak
43	Isgaarsiinta	Isku-xirka isgaarsiinta	VBH Holdings SPA	Qandaraas	2016	Ma sii socon
44	Wasaaradda Korontada iyo Biyaha	Koronto dhalin	Polaris Energy SDN BHD	Qandaraas	2015	Ma sii socon
45	Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada	Hawlaha garoonka	Favori LLC	Qandaraas	2014, 2019	Wuu socdaa; heshiis dib ayaa looga gorgortamay, waxaana la saxiixay May 2019
46	Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada	Shatiga baabuurta	Modern Technology Ltd.	Qandaraas	2016	Waa la joojiyay
47	Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada	Adeegga basaska ee garoonka	Sahel	Qandaraas	2017	Wuu socdaa; GMM waxuu ku taliyay in dib looga wadhadlo
48	Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada	Hoteelka garoonka	Sat Service LLC	Qandaraas	2018	Heshiis ku meel gaar ah ayaa la la sixiixday DFS horraantii 2020; qandaraas rasmi ayaa loo baahan yahay in la diyaariyo
49-54	Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka, iyo Dalxiiska	6 heshiis oo lagu horumarinayo hantida maguurtada ah ee magaalada Muqdisho	Heyado kala duwan	Qandaraas	2019	Xaaladda qandaraasyada ma cadda; GMM waxuu ku taliyay in la joojiyo ama dib loo eego
55	Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka, iyo Dalxiiska	Overflight arrears debt collection services Urururinta deymaha ururay ee maridda hawada	Go'aan u baahan	Wax soo iibsi	NA	Tartan furan ayaa la diyaarinayaa
56	Hay'adda dhawrista tayada ee Soomaaliyeed	Barnaamijka Qiimaynta Shixnadda la soo dhoofiyay	Go'aan u baahan	Wax soo iibsi	2021	Qandaraaska oo qabyada ah ayaa dib loo eegay; hindise ayaa la diyaarinayay
57	Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda	Adeegyada diiwangelinta iyo Shahaado siinta Maraakiibta Badda	Go'aan u baahan	Qandaraas	2021	Qandaraaska ayaa qabyo ah; GMM waxuu ku taliyay in bixinta qandaraasku aysan sii socon

Lifaaq C: Liiska hindise sharciyeedyada iyo heshiisyada uu soo celiyay Baarlamaanku markii uu dhamaaday muddo xileed-kiisa

- Hindise sharciyeedka Maareynta Deegaanka
- Heshiiskii Dhismaha Ciidamada heeganka ah ee Bariga Afrika
- Heshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Bariga iyo Koonfurta Afrika
- Hindise-sharciyeedka Diiwaan Gelinta Sumadaha Ganacsi
- Heshiiska Xubnimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Suuqa Wadajirka ah ee Bariga iyo Koonfurta Afrika (COMESA)
- Hindise sharciyeedka Booliska Soomaaliyeed
- Xeerka beegsiga Cunaqabataynta Maaliyadeed,
- Hindise-sharciyeedka Nidaamka Canshuurta ee Kheyraadka La Qoto
- Hindise sharciyeedka Shaqaalaha Rayidka
- Hindise sharciyeedka Hawlgabka iyo xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda
- Hindise-sharciyeedka Xakamaynta Hubka wax dila
- Hindise sharciyeedka Danbiyada Jinsiga
- Hindise-sharciyeedka Wadooyinka
- Hindise-sharciyeedka Xamuulka iyo Xadeynta Cabirka Baabuurta
- Hindise-sharciyeedka Daawooyinka
- Hindise-sharciyeedka Wax-ka-beddelka la dagaalanka Burcad-badeedda iyo Afdubka
- Hindise Sharciyeedka Difaaca Qaranka
- Heshiiska Soomaaliya iyo Turkiga ee Iskaashiga, Horumarinta iyo Ilaalinta Maalgashiga
- Hindise sharciyeedka Ilaalinta Maalgashiga iyo Maalgashtaha
- Hindise sharciyeedka Wakaaladda Horumarinta Maal-gashiga
- Sharciga Qaxootiga
- Hindise Sharciyeedka Ururada aan Dawliga ahayn
- Sharciga Hay'adda Socdaalka
- Xisaab Xirka 2018

